# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

**Kal-fadhigii 39aad Fadhiyadii 6aad, 7aad iyo 8aad**

**Isniin, Salaasa, Sabti 18, 19, 23 March 2019**

**Quraanka: -** Md. xaamud

**Gudoonka: -** Gudoomiye Md. Baashe M. Faarax

**Ajandaha Fadhiga:-** Doodda Falanqaynta Xaaladda Siyaasaddeed ee Geeska Afrika

**Gudoonka:-** Mudanayaal, sidaynu Ajandaheena ku ansixinay waxa ugu horeeyay ka doodista Xaalada dalka iyo qiimaynteed, maanta waxaynu bilaabaynaa doodda Xaalaada siyaasadeed, marka mudanayaasha ka doodaya ha is-qoraan.

**Md. C/raxmaan Maxamed Jaamac (Aw Xoog)** **"11min 12sec"** Bismilaahi, ASC, Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Saxaafada iyo Marti sharafta xaga dambe fadhida waxaan idinku salamaaya mar labaad ASC, sidii aan sheegay maalintii Ajandaha aynu ka dooddaynay doorashadii dalka ka dhacday November 2017 waxay bulshada Somaliland u keentay kala qaybsanaan ku qotonta ama ay saldhig u tahay qabyaalad, lama qabo Madaxweyne Muuse Biixi in arrinkaas laga bugsaday ama laga heshiiyay sidii uu ka sheegay markii uu la kulmay jaaliyada Somaliland ee ku dhaqan Dalka Emaraadka Carabta, Gobolo la booqdo oo laga doortaya Xisbiga Waddani arrintan ma bogsiin karto, Madaxweynuhu wuxuu sheegay in Goboladda Gabilay, Maroodi-jeex iyo Burco aan looga soo dhowayn sida looga soo dhoweeyay Goboladii laga doortay Waddani, marka Goboladaas Gabilay, Maroodi-jeex iyo Tog-dheer Xisbiga Waddaniba waa laga doortay ee gaar uma aha Xisbiga Kulmiye, aniga waxa la iga doortay Magaaladan Caasimada ah,waxaana ahay Xildhibaanka kowaad ee Xisbiga Waddani.

Arrintii halkaa maraysay ee qabyaalada ina kala qaybisay ahayd baa waxaa loo qaaday Gobolka Deegaanka Somalida ee Itoobiya, halkay arrartaydu u socotay waa halkaas, waxaynu la midnahay islaatii xaabadda sidatay ee intay la kici karri wayday tidhi xaaba kale iigu darra, waxaa la mid ah shirkii ay xukuumaddu abaabushay ee lagu qabtay Addis-Ababa,

**Gudoomiyaha: -** Xildhibaan Cabdiraxman ka daa Abaabulka shirkii lagu qabtay.

**Md. Cabdiraxman Xoog:-** Abaabulka waan cadaynayaa, mashruucan wuxuu bilaabmay abagandayaasha uu keenay Safiirka Somaliland u fadhiya Itoobiya, waxa ku soo kordhay luuqadii Af-somaliga kalmado aan hore ugu jirin dhaqanka Somalida ee xaga madax-

dhaqameedka oo la yidhaahdo *Abagandde,* markii abaggandahaas la keenay ayaa mashruucan la bilaabay.

Waxaan cadaynayaa, wuxuu dastuurku ii ogol yahay wixii aan maqlay xan ha igu soo gaadho ama suuqa aan maqlee, waxa i soo gaadhay in Xukuumadu $150 kun oo dollar ku bixisay in shirkaas la abaabulo, lacagtaas $100 kun waxaa bixisay Xukuumada, $40 kun waxaa bixiyay niman ganacsato ah, waxaana lacagtaas gacanta loo galiyay ninkii yidhi waxaan ahay boqorka Dir ee Gara'ha ahaa.

Lacagtaasi waxay inaga dabooli lahayd qaar ka mid ah baahiyaha Somaliland ka jira, dadka haraadka ugu dhamaanaya Somaliland ayay saddex ilaa shan kun oo booyaddood loo siin lahaa lacagtaas aynu fidnada ku galinayno dalkan jaarka ah ee degaanka Somalida Itoobiya wax badana wadankeena way ka tari lahayd Gudomiye, maaha inaynu faragalino dadkaynu jaarka nahay ee nabada kuwada yaalla oo aynu qabyaalada u rarrno.

Anigu waxan ahay Xildhibaan Somaliland ah laakiin dadka isoo doorta kala badh waxay ku maqan yihiin Deegaankaas Somalilada oo aan ku leeyahay degmooyin iyo daaqsin, waad arkayseen dadkii isoo doortay inay maalin dhowayd ku shireen Magaalada Caddaadlay, waxaa ka mid ahaa qodobadii ka soo baxay in wixii ay Somaliland ku leeyihiina ka helaan oo u doontaan, Deegaankaas Somalida Itoobiyana waxay ku leeyihiin u doontaan, inagu waxaynu ku leenahay taakulayn iyo talooyin madaama aynu nahay Xildhibaano Somaliland ah, kuma lihin farogalin, waxaana kula talinayaa sidii uu gudoomiyuhu inooga mamnuucay inaynu qabiil ku hadalno, in xagaana xisbiga ku abtirsada qabiil oo magaciisu qabiil ka horeeyo aan halkaas laga samayn, talo ayaana ku leeyahay in Xisbi magac qabiil ku abtirsada aan laga samayn waayo dadka aan matalo ayaa kala badh joogaan marka xadka laga tallaabo. Sidaa darteed, anigu ma qabo asxaab magac qabiil lagu maamulaye waxaan leeyahay axsaab badan samaysta sida Somaliland.

Inaguna in wadan dad Somali ahi wadda degan yahay oo si wanaagsan wax u qaybsada inaynu qabyaalad la doonano maaha, Geeska Afrika isbadal baa ka socdo, isbadal walaaltinimo, is-dhexgal iyo dib u-heshiis, maanta dalka waxa imanaya oo saaka soo degaya Wasiirka Arrimaha Dibadda Eretariya, war marka ertariya inoo imanayso ee Abby Axmed iyo Afawerqi gacmaha is haystaan, ma markay farmajo u yeedheen, maxaa inaga walaaltino inoo diiday in kuwa dad inoogu xiga ee dhowrka kilomitir inoo dhexeeyaan gacmaha is qabsano ee aynaan fidno qabiil oo inaga ina aafaysayaan galin, waxaa loo baahan yahay inaynu wanaag u waaridno deegaankaas somalida ee aynaan xumaan, abaggade iyo Af aynaan aqoon oo dhaqankii Somaliland ku jirin iyo xeerarkeeda, xeerbeegtideedda maaha in lagu soo daro, marka waxan taageersanahay in faraglinta laga daayo deegaankaas Somalida ee Itoobiya, iyagoo nabad ku naalooynayana in dab la sudho maaha.

Waxaan ku soo gaba-gabaynaya, $150 kun ee dollar ee dabka lagu shidayo dadka Somaliland ee haraadan biyo ha loo siiyo shan kun oo booyadood bay u goynayaanayaane. WCS.

**Md. Axmed Ducaale Bulaale** **"5min 25sec"** Bismilaahi, horta marka hore siyaasada geeska markaynu ka hadlayno waxaynu ka hadlaynaa waa saameynta ay inagu leedahay iyo wax ka dhacaya, runtii siyaasadda geeskuna saamayn farabadan bay waddan ahaan inagu leedahay, marka la eego isbadalkii cusbaa Raysal Wasaaraha cusub ee Abby Axmed markii hore si bay inoo saamaysay laakiin waxba iska badalay markii dambe waxa iska badalayna way muuqdaan, markii hore waxaad moodaysay inuu dan ahaan indhaha inaga la-liyay laakiin sidaa aan sheegay markii dambe waxbaa iska badalay, waxana tusaale u ah socdaalkii u dambeeyay ee Madaxweynuhu ku tagay sida loo qaabilay iyo wixii soo dhex maray.

Qodobka kale ee siyaasada geeska inaga khuseeyaa waxa weeye Wadda-hadalkii inaga iyo Somaliya oo isna shaashada ku jira oo madaxda Gobolku doonayso inay saamayn ku yeelato, arrimahaas oo dhan waxaan filayaa siday u dhacayaan si fiican baa loolla socdaa.

Arrintan uu Xildhibaankii iga horeeyay ka hadlay anigu ra'yi kaas ka duwan baan qabaa, laba ra'yi baana jira ay kala hogaaminayaan Wasiirka Maaliyada Itoobiya iyo Madaxweynaha Killidhka iyagaa kala hogaaminaya laba ra'yi ee inaguna ku kala faylnay ee aynu ka dooddayno raga qaarna naqdinayo, su'aasha iswaydiinta leh waxa weeye siyaasada labadaas ra'yi ku saabsan anigoon qabiilaynayn ma halkeena laga hogaaminayaa? Mise Itoobiya laga hogaaminayaa?

Anigu waxan aaminsanahay Itoobiya laga hogaaminayaa waana xaga sare ku xusay sida loo kala hogaaminayo, su'aasha kale ee iswaydiinta leh waxa weeye markaynu siyaasada mandaqada ka hadlayno inagu sidee baynu u abaaraynaa ama sidee baynu u eegaynaa siyaasadda halkaas ka socota? Ma iyadoo sidaas u socota baynu ku kala baydhayaa oo kala taageeraynaa oo laanahay tanaa wacan iyo tana ka wacan? Mise waxaynu iswaydiinaynaa halkee baynu ka aadnaa ee inagu haboon, anigu waxan qabaa killidhka Somalidu degto ee inagu dhow markaynu ka hadlayno sida danteenu ku jirto inaynu ka eegno, laakiin ma qabo hadii siyaasado itoobiya jiraan inaynu ka eegno, mana ah mid aynu inagu bilowgeeda leenahay oo kharashgaraynayno oo ma qabo anigu, waxaynu ku leenahay inay iswaydiino oo ogaano siyaasada meesha ka socda halkaynu ka aadayna ee aynu door ku leenahay, siyaasada deegaanku waa maxay waa inaynu iswaydinaa oo ka jawaabnaa. Waad-mahadsan tihiin, WSC.

**Md. Dr. Maxamed Axmed Carabayto** **"5min 1sec"** Shir-gudoonka, Mudanayaasha waxaan idinku salamaayaa Salaanta Islaamka ASC, topic-geenu wuxuu ahaa Geeska Afrika iyo siyaasaddiisa, markaa waan ku koobnaanayaa geeska afrika inta inaga khuseysaa waa Itoobiya, Djabuuti iyo Somaliya kaa mawduuc baan ka dhiganayaa,

waxaan u soo gudbayaa marka Somaliya iyo Somaliland, Somaliland iyo Puntland iyo Somaliland dhexdeedda afartaa topic baan rabaa inaan ka dhigo oo ku dheeraan maayo.

Tan kowaad ee Itoobiya, Djabuuti iyo Somaliya hadaan ku bilaabo, Itoobiyaha xidhiidh badan oo 30 sano ah baynu leenahay, waxad moodaa hadeer inaynu gacan madhan ka taaganahay, Djabuutina aad moodo inaynu ka dhiganay wiil inagu aynu dhalnaya mar horuuse inaga durduriyay oo maanta Xamar buu ka degay, inan intuu kacay cararay weeye hadaynu markii hore dhabta ku haynay, waxan moodaa Somalilanadna inay xaaraan ka tahay in la soo qaado Siyaasada Djabuuti, waxan u arka inay tahay halka xudunta u ah siyaasada geeska halkaynu ka galayno oo Madaxweynihii Faransiiska yimi wixii uu u yimi iyo wuxuu siday ma garanayno waa kaas Ismaciil Xamar ulla cararay wax inaga soo gaadhayna ma jiraan.

Somaliya, iyada halkaynu kala marayno waynu ognahay oo xaalado soo dhowaanayaa ma jiraan wax sii fogaanaya mooyaane, waxaadna moodaa arrinkii Somaliya inaga dhexeeyay in la soo raray oo Puntland oo agteena ah in la keenay wax Siyaasadda oo aynau ka qaadanay ma jirto, Puntland sabab aynu u colawno iyo waxaynu u hadalna ama waxay inoo hayaan midina dee ma jirto, waa dad aynu jaar nahay, waana dad uu inaga dhexeeyo xidhiidh, xidhiidh dhaqaale ayaa inaga dhexeeya faa'ido daro ayyna inoo tahay wax xamar inaga xidhan inaynu jaarkeena ku colawno, waxaynu doonaynay inaynu go'no oo xornimo qaadano midna inooma hayso, waana la inagaga guulaystay hadii arrintii somaliya inaga taalay Garoowe la inoo keeno, Garoowe jaar baynu nahay oo inago intan ka liidana baynaan xumaan ka dareemin oo nabada kuwada noolayn, waxaan jeclahay aad baa la inoogaga guulaystay in gurigeena la inagu gubee waa in laga hortago siyaasi ahaan puntland la dhaafiyo colaadeena iyaguna waa dad sideena survivor qaba mana fiicna dad survivor qaba in la iska horkeeno.

Somaliland dhexdeeda, Somaliland waxay u baahan tahay in itijaaheedda la toosiyo oo dhexdeedda laga hagaajiyo, wayna jiraan oo sidaas Cabdiraxman sheegayay dadka qaarba wali xisbiyadii ka cabanaya, sanadkii labadaad baa la maryaa, waxaan islahaa dee improvement bay qaadato iminka Nationaly baa loo gudbayaa, tan dambe in laga sii wadda hadlo baa muhiima, wixii dhacay way dhaceen nin cabanaya iyo nin guulaystayba, laakiin maxaa tan ka dambeeya oo ku xiga, hadii xisbi cabanayo inuu tan dambe u sii diyaar garoobo oo improvement sameeyo baa muhiima, wax cabasho tarimayso oo hadii wax xumaadeen way xumaadeen wixii wanaagsanaadayna way fiican tahay, waa inay ka hadalna future-ka iyo danta Somaliland.

Waxan jeclahay halkan iga dambeysa nin baa illaa Caarre ka hadlay, waxan anigu qabaa waa markii u horaysay ee jabhad ama nin isku sheegay inuu wax abuurayo oo Somalilanad ka tirsani baxo, there is a reason, sababta maxaa keenay ninka iga daba hadlayoy iswaydii, in wax laga qabtay u baahan tahay oo solution loo keeno peaceful ah,

maaha in solution qudha laga hadlo, solution qudha meelna waxba ma gaadhsiiyo. We have to make solution, waad-mahadsan tihiin, WSC.

**Md. C/raxman Yuusuf Cartan** **"7min 38sec"** Shir-gudoonka, Mudanayaasha Golaha Wakiilada iyo Saxaafadda ASC, dhowr qodob baan jeclahay inaan ka hadlo, horta arrinta ku saabsan Wadda hadalka Somaliya iyo Somaliland waa arrin muhiima weeye laakiin mar walba waxa la dhaliilayay cidda saldhiga u ah wadda hadaladaas, inkasto uu dalwayn yahay oo xidhiidhkeenuna wanaagsan yahay kana mid yahay dalalka si toosa ah diblumaasiyadiisu u furan tahay halkan oo calankii ka taagan yahay oo ah dawlada Turkiga, passaporka Somalilandna lagu dhoofo, dad badan oo Somaliland meeshaa tagaan waana ugu mahadnaqayaa dhiiranaantaas iyo in aanay cuqdad qabin, hadana waxa la yidhaahdaa waligiis muu taageerin laba dal oo kala tagay sababtuna isaga laftiisa ayaa jira qaar raba inay dalkiisa ka go'aan, markaa arrintaas inuu Turkigu daacad ka noqdo dhex-dhexaadinta Somaliland iyo somaliya ma dhacayso oo halkaas barigii aynu hawshan galnayba far baa lagu godayay.

Laakiin nasiib daro xukuumadihii Somaliland ee kala dambeeyay arrintaas dhug umay yeelanin, waxaana lagama maarmaana ah in Turkiga qodobkaa loo sheego oo la yidhaahdo war nimanyahow waanu idin aaminay inaad tihiin dhex-dhexaadin hasayeeshee sidaad uga daacad tihiin ma hubno, marka qodobkaas maaha in halkaas lagu dhaafee xukuumadu inay ka hadasho muhiim bay ila tahay aniga.

Qodobka kale ee meesha jira waxa weeye geeska Afrika waa la isku soo dhowaaday, Eretria, Itoobiya, Somaliya, Kenya iyo Djabuuti waxaan filayaa Xukuumada waxa looga baahnaa inay dhaq-dhaqaaq ay ku sharaxayso qadiyada Somaliland ugu baxdo oo ay dirto Wasiiro oo ay dirto Xildhibaano Baarlamaanada dalalkaas taga oo arrinta Somaliland qadiyadeeda u sharaxo dalalkaas, inta badana Wasiir meel tagay qadiyadeena ma sharixi karo people to people baa jira wax la yidhaahdo dalka Eretria oo kale ama dalka Itoobiya oo kale ama dalka Kenya oo kale la tago oo loo sharaxo qadiyada Somaliland sababta ay waajib u tahay in qadiyadaas lagu taageero.

Xukuumadihii Somaliland ee kala dambeeyay dhaq-dhaqaas may samaynin, kuwooda ugu fiican hal Wasiir bay dirayeen Wasiir kale la soo hadla, laakiin people to people dadka lagama dhaadhicinayn qadiyada Somaliland.

Hadaan intaas kaga baxo siyaasadda arrimaha dibadda, Gudoomiye waxaan rabaa iyana inaan ka hadlo arrin ku saabsan isla dibadii ah laakiin dhaqaaleheena saamayn ku leh, taasi waxa weeye Shirkada la yidhaahdo DP World, sida aad ka warqabaan dee Golahana laga ansixiyay heshiiska DP World, dhaq-dhaqaaqeeda waa in Goluhu xog intan ka badan waxa ka socda DP World ogyahay, maaha in qofka shicibka ah ee suuqa jooga iyo DP World ay isku war ka yahaan shirkadaas iyo dhaqdhaqaaqeeda. Maalin dhowydto warka na soo gaadhayaa wuxu sheegayaa in ay dollarkii iyaguna fara-galiyeen oo lacagtii

Somaliland ee cashuurta lagu qaadayay dollar u badaleen taasina ay sixir bararkii qayb ka qaadatay, barigii aynu ansixinaynay heshiiskaas waxa ku jirtay Bebera Corridor in DP World dhisayso, hadana warar damba ka soo daba-dhacaya oo sheegaya in DP World aanay dhisayne Saldhiga ayaa dhisaya, sidaa darteed, Waxaan codsanayaa Gudoomiye kaa inaad xukuumada inoo waydiisidin Golaha laga briefing gareeyo, dooni mayno in warar kutir-kuteen ah halkan inaanu ka sheegno, laakiin laga xog-ogaal galiyo shirkadaas dalkeenii qaybta muhiimka ah ka ah ee aynu rajaynayno in horumrin badani inooga soo socdo, marka waxaynu u baahanahay in Golahan ay briefing-gareeyan ciday khusayaso.

Waxa kale oo aan halkan ka sheegayaaGudoomiye, waa inaynu ogaano jiilaal badan baa la soo maray dhul badan baa abaaro ka jiraan, marka waxan soo jeedinaya in Xukuumadu aanay sugin inta la baa'baye in loo diyaar garoobo Gu'gu inuu habsaamo oo March iyo April ilaa May da'o Gu'gu, marka in hawshaas loo diyaargaroobo ayaan soo jeedinayaa.

Qodobka u dambeeya ee aan ka hadlaya waa qodobka Cabdiraxmankan i ag-fadhiya ka dhawaajiyay, horta xildhibaanaynu nahay, warkeenuna meel dheer buu tagayaa, warka aynu halkan ka sheegaynaa wuxu u baahan yahay inaynu ka fikirnno, anigu inaynu galino wax kala qaybinaya dariskeena sidaas waan la qabaa aynaan yeelanin, laakiin dhab ahaanii fikiradan qabaa'ilku ma wax inoo yimi baa inta meel kale laga soo abaabulay? Mise waa waxaynu inagu abaabulnay? hadaynu nidhaahnoinaga abaabulnay waynu dulminaynaa oo inaga is dulmiyayna, Somaliland baynu war aanay shaqo ku lahayn iyo eeddo baynu u soo jeedinaynaa, dad wax ka dhexeeyaan oo aynu daris nahay oo aynu walaalo nahay baynu shaki ku galiniaynaa, markaa aniga waxay illa tahay arrintaasi dibaday inooga timi Cabdiraxmanow laga yaabee in la inoo soo adeegsaday safiirkeena, hase yeeshee waa inaynu arrintaas ka taxadarno inagu mar walba nabad iyo wadda-jirka isu ururino.

Ugu dambeyna waxan doonayaa Gudoomiye, inaad ka hawl-gasho arrinta ku saabsan base-ka iyo arrinta ku saabsan DP World oo hawshaas Baarlamaanka laga briefing-gareeyo, oo dee warkaynu haynaa aanu noqon warka dadweynaha iyo wax kutiri-kuteen ah. WSC.

**Md. Siciid Cartan Cismaan"8min 03sec"** shirgudoonka iyo mudanayaashaba waan salamayaa, hadii aynu ka hadalno xaalada geeska Africa waana loo baahnaa in aan qodobka noocan ah ugu soo horaysiino Ajandaha waayo duruufo badan ayaan ka jira mandaqadan Geeska Africa oo inana aynu ku Ab-tirsano.

intii uu raysal wasaarahan Ethioipia Qabsaday dalka waxaa socota runtii dabayl aad u caadifadaysan oo faa'iido ama khasaare labadaba keeni karta, markaa in aan qaran ahaan ka fikirno waa shay inagu waajiba oo sida aad ka war haysaan Ethiopia iyo Eritria way heshiiyeen, laakiin inaga wax ayaynu la wadaagnaa waxna inaga ayay inoo gaar yihiin

oo waxa inaga dhexeeyaa uu yahay baayac-mushtar,laakiin arinka ugu muhiimsani waa Gooni Isku taaga qaranimadeena Somaliland ee aynu la daalaa dhacaynay mudadii 27sano ahayd ee ay somaliland jirtay kol-ba meel ay joogtayba.

Somaliland maanta waxay gaadhay meel aanay dhaafi karin oo ah halkii ugu saraysay halkii ay u dhaafi lahaydna dadka waa laga qarinayaa oo hadii aan talo qaran laga galina nina kaligii ka dhalin maayo, qodobka lagu xidhaana waa kan wada hadalka inaga iyo Somalia iyada oo aanay jirin wadan maanta ina ictiraafayaa, laakiin waxaa uu ku xidhan yahay ictiraafkeenu in aynu ku heshiino inaga iyo Somalia in aynu kala go'no waana in hadalka runta laga sheegaa ayaan qabaa. Waayo maxaa la inoo ictiraafi waayay intaas oo sano.

waxay taagantahay Eritria iyo Ethiopia intii ay dhibaatadu dhex taagnayd oo ilaa ay ku heshiiyeen in ay kala go'aan qas iyo dhibaato, maalintii ay ku heshiiyeena si dhib yar ayay u kala go'een, markaa waxaan qabaa in uu kala go'eenu uu ku xidhan yahay Somalia waxba yaynaan dhex meeraysanin meelo kale e' waa in aan xidhiidhka aan Somalia la leenahay waa in aan xoojinaa oo aan xidhiidh togan aan la yeelanaa waayo waa dad walaaleheen ah.

Waxanan taageersanahay in aynaan meel madaw kuwada hadlin ee waa in la ina dhex joogaa, waxaanan ku talinayaa in aynaan farmaajo halka ka caayine waa in anu afkeenana wanaajinaa xidhiidh wanaagsana aynu yeelanaa sida aynu u kala baxaynana waa in aynu eegnaa.

Waxaa kale oo aan taageerayaa xidhiidhka aynu imaaraadka la leenahay waa xidhiidh aanu manfac badani aanu ka muuqan ilaa iyo hada iyada oo aynu Dekadeenii ku wareejinay iyada oo hada wadadiina la xaadh-xaadhayo weyna bilaabmasaa ayaa la yidhi waynanu ee egaynaa in ay inoo bilaabmaan.

Waxaa kale oo iyaduna cajiib ah heshiisyada golaha ka baxa waa in dabagal lagu sameeyaa oo dib u eegis lagu sameeyaaa, waayo markii aynu heshiiska sexeexaynay waxaa ku jiray madaar cusub oo rayid ah in la sameeyo, markaa waxaan taageerayaa xildhibaankaa hore siduu sheegay in heshiisyada dabagal lagu sameeyo oo wixii ka hirgalay golahan la hor keenaa. Mida kale waa in aanay dooddeenu noqon sida inoo caadadda ah wax la iska hadlo oo inata aynu dooddno wax ka soo baxaa aanay jirin, ee waa in ay noqotaa mid wax ka soo baxaan oo ay noqotaa mid xukuumadana saxaysa umadana wax u taraysa.

Waxaan ku soo gabogabaynayaa, waar hawlahan ka socda Geeska Africa ha loo midaysnaado oo yaan loo eegin xisbiyo, reero iyo wax kalana toona ee waa arin qaranka oo dhan saamaynaya waa in arrinkaa talo qaran laga yeeshaa oo aragti midaysan lagu waajahaa, waanan ka baxay.

**Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf** **"5min 17sec"** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, shir-gudoonka iyo xildhibaanaduba waa salaamanyihiin, waa wax wanaagsan in aynu ka hadalno arrimaha siyaasaddeed oo geeska, geesku dawlado ayuu ka samaysanyahay, dawladuhuna qaybo yar-yar ayay ka sii samaysan yihiin, qabiil ama wax kale aan idhaahdee hadii uu xildhibaanku ka hadlo waxaan jeclahay in aan lagu qaylin ee la ixtiraamo ra'yigiisa gudoomiyahana loo daayo hadii uu ka boxo ujeedadda.

Waa kii Raysal Wasaarada Ethiopia ku dhawaaqay in uu isku ururinayo, sida africa ka dhacda wax xuna maaha ee waxaan u haystaa wax wanaagsan sida ay ragii horeba odhan jireen"*African to Unite*" hadaba ka qayb galka Somaliland in uu noqdo mid madax banaan oo aanay Dawlad kale magaceena anay ku hadli karin hadii lagu hadlayana waa in uu mageceenu meesha joogaa.

Mawqaceena strategy-ga ah ee illaahay inagu Abuuray ayaa inoo hiilinaya, maalin dhaweyd waxaan kiiniya ka maqlayay in uu yidhi yaanu farmaajo aanu wax shuruud ah ku xidhin Muuse Biixi arintaasina way jirtay, waxay ila tahay mawqaceenu ha inoo hiiliyo oo aynaan marnaba ka tanaasulin wax somaliland layidhaa, waxaad aad maqasheen ee somaaliya maamul goboleedyo ahi waa Somaliland canjila ee midnimoo kale oo ay leeyihiin ma jiraan.

Xidhiidh an madaw ee aynu la galnay imaaraadka ee inaga oo xildhibaano ah ayanaan garanayn wax uu yahay ee la inaga mam-nuucay in aynu eegno wixii saxda ahaa ee malaha dawladuna aanay garanayn, waxaan soo jeedinayaa in sida ay jabuuti yeeshay aynaan eryin aan daysano waxbay hayaan oo dalkeena waxaa ku filan wax yar oo aynu ka soo qaadno si wanaagsana aynu u isticmaalo.

Hadii aynu wax soo saarka xoojino, hadii aad wax ka hadasho adiga oo ay daacad kaatahay waxaad arkaysaa xildhibaan odhanaya maya oo diidaya waana guul darooyinka ina haysta, waxaan daacad iga ah waar saddexdan milyan ee aynu nahay lacago ciidaa ka badan ayuu ilaahay dhulkan ku manaystay ee waa in aan nidhaa waar biyaha noo qabta, caafimaadka wax nagala qabta oo wax barashada wax nagala qabta, waana marka hore in aanu igu gudeheena iska ictraafno.

Waxaan leeyahay waa in aad aad uga fiirsanaa oo aynu tagnaa inaga oo la leeyahay soo dhawaada somalilalaaneey oo calankeenu meel walba ka taagan yahay waa in aan ka qayb galnaa ayaan leeyahay oo aan aad ugu fiirsano ayaan leeyahay Wsc.

**Md. maxamed xaaji yuusuf Ahmed( waabeeye)** **"7min 6sec"** Waxaan u mahad celinayaa Shirgudoonka iyo Xildhibaanada Sharfta leh,waxaan u Maleymayaa Isbedelka Geeska ee aan ka hadleyno waxa uu ka dhashey Dawladan Jaarkeena ahayd ee Wadanka Ethiopia 2/4/20I9 markii uu Ninkan dhalinyarada ah Abey Ahmed ee 42 jirka ah uu noqdey Reysal wasaaraha Ethiopia

Sidaas darteed waxaan soo dhoweyneynaa Isbedelkaa ka dhacay Wadanka Ethiopi takale inagu warwar ayaan ka qabnaa colaada ama kacdoonka ka jira wadanka Ethiopia ,ama Colaada ka dhexeysa Wadanka Ethiopia iyo Eleteriya ,taas oo uu qaadey Reysal wasaaruhu,

Ethiopia Mandaqadan aynu ku nool nahay waxa la yidhaa waa 110 milyan 2019 waxaa la yidhaa 2.5% ayey kordhaan sanadkiiba ,waxaana kaalinta I2-kaga jiraan tirade korodhka aduunka ,hadaba wadanka caynkaas ha wixii ka dhacaa aad iyo aad ayuu muhiin nuugu yahay inaynu ogaano ,Reysal wasaarahaas qabsadey wadanka Ethiopia waxaad moodaaa in aqoontiisii oo dhan uu geliyey Geeska Africa , hadaba maxaa nooga meel yaal ee nagu waajiba ah inaga ayaan doonayaa inaan ka hadlo, hadaba waxaa nagu waajiba Dawladaa Ethoipia Isbedelka ka dhacay in aynu ka faa,iidaysano si ( positive) ah masalan xagga ganacsiga waayo 110 milyan malaha bad laakiin inagu waxa aynu leenahay bad aad u dheer oo ilaahay nagu manaystey markaas waa in aan xoojinaa xidhiidhka naga dhexeeya gaar ahaan wadan ka Ethiopia

Waxaan kaloo ognahayin Ganacsiga naga dhexeeya inaga iyo Ethiopia inuu yahay mid dhinac ka raran , waxaa nooga yimaada qaad keliya , inaguna waxaa aynu leenahay Xeeb ay ka buuxdo Milix , Kaluun hadaba waxaa nala gudboon in dawladu yeelato qorshe cad sidii ay ugu dhoofin lahayd nimcadaas wadankeena jiifta , waxa kale oo loobaahan yahay dekedan ay noo maalgelisey DPworld inaynu u sameyno qaabeyn fiican si ay dekadu u waraabiso 110 milyan oo ganacsigeenu u xoogeysto ,waxaa kaloo loo baahan yahay in xuduudaha la furo ,waxaa kaloo loo baahan yahay in loo yeedho kuburo naga caawisa qaabka ay u shaqeeyaan dekaduhu mustaqbalka dhow iyo ka fog ,waayo waxaa jira dawlado danaynaya in saldhigyo ka samaystaan Geeska Afrika sida Dawlada china oo saldhigii u horeeyey ka sameysatey dawlada Jabuuti , Dawlada Jabuutina waxa ay isticmaashey cagli badan oo ay ku marti gelisey dawlado badan oo dano kala duwan leh iyada oo wadankeedii saldhigyo ka siisey,

Sidaas darteed inagu yaynaa Dpworld u arkin leytar khadar ee waa in aynu la jaan qaadnaa aduunka iyo horumarka ka socda geeska waayo waa in aynu la macaamilnaa dawladaha dunida sida china iyo dawlahaha kele ee dano siyaasiya naga leh, waxaa kaloo laga yaabaa in aynu ka helo mashaariic uu u baahan yahay wadankeenu sida laamiyo iyo china oo aan ka heli lahay tareenadan uu u sameeyey wadamada jaarkeena, markaas waa in aynu u yeedhano china ama dawlado kale

**Md. Faarax Maxamuud Cabdille:-** **"14min 22sec"** Mudane gudoomiye waxaan anigu ugu horeysiinayaa dalkeena waxaa ka jira abaaro baahsan oo wadan ka ka jiara siiba dhinaca bariga oo abaartii hore ee wadanka soo marteya ayey abaartanina xidhiidh la leedahay .sidaas darteed anaga oo gudaneyna waajibaadkeena waa in ayanu ua yeedhno masuuliyiinta ku shaqada leh,hadii ay noqoto Abaaraha iyo Afooyinka ,iyo hay,ada kaydka raashinka iyo hay,adaha barakacayaasha si aynu uga waraysano

waxyaalaha ay ugu talo galeen dadkaas biyo la,aanta iyo abaaruhu hayaan dadkeenaa dhinaca kale culeys wayn ayey ku hayaan deegaamada bari taasina waxa ay keentey marba marka ka sii dambeysa ay Abaaruhu ku sii xumaato goboladaa bari xaga biyaha iyo daaqaba ,Dadkeenaa waxa haysta xaalado adag waxaana waajib nagu ah inaynu u baraarug sanaano oo hay,adaha khuseeya u yeedhno ,hadaba waxaaan soo jeedinayaa arimhaas

Xaalada siyaasada iyo geeska Afrika ee xildhibaanadu ka hadleen ,anigu waxaan odhan lahaa Arinkaas waa arin xasaasiya waana in si fiican loo eegaa ,in si qabyaaladeysan looga hadlo ama si reereed maaha Qaran ayaanu nahay waana in si Qarana looga hadlo,Odayaashuna inay si siyaasadeysan oo qaran ah uga hadlaan ayaa loo baahan yahay waxaanan soo jeedinayaa in aynaan waxa kastoo socda iskaga dhex dhicin,aynu xog badan raadino,oo aynu ka waraysano wasiirka arimaha debeda iyo madaxweynaha oo shirgudoonku noo soo waysto, si ay inagana noogu waramaan , Arimahaas oo kale marka laga wada hadlayo waxaan soo jeedinayaa in fadhi xidhan goluhu kaga hadlo oo saxaafada laga daayo wixii aad xasaasi u ah,waana in wasiirka arimaha debeda loo yeedho ,waana in su,aalo ka weydiinaa fadhigaasina noqdaa fadhi xidhan,wax walbana in miidhiyaha loobandhigaa maaha , anigu waxaan odhan lahaa yaan sirteena debeda la soo dhigin ,taasi soojeedin weeyaan

Hadii aan ka hadlo dhinaca dhaqaaleheena ugu weyni waxa uu ka soo baxaa dekeda berbera, waxaan qabaa heshiiska DPworld aynu la galey ilaa hada muudhaqaaqin waxaana ku gadaaman madmadow, sheerka dekadu waxa uu kala ahaa 65% Dpworld ah iyo ainagoo 35% ah, markii dambena Ethiopia ayaa ku jirta ayaa la yidhi ilaa hadana wax ma kala cada, maalin walbana dhagax ayaa meel la dhigayaa oo la leeyahay maanta ayaa la bilaabayaa ilaa hada wax la bilaabeyna ma jiraan,

Waxaan soo jeedin lahaa wixii dawlada iyo golaheedu isweydaarsadaan in miidiyaha lala soo istaago maaha , halkan wasiirka ganacsigu wax uu ilaacada ka yidhi Dp world ayaa naga codsatey in qiimaha la kordhiyo , qiimahaas la kordhinayo waa in dawladu ku dhameysato qoraal ee waa in ayna keenin saxaafada oo umada loo soo bandhigin , Dawlada wax laga doonayaa in ganacsatadeeda iyadu qanciso,maaha wax walba in saxaafada la keeno , mudanayaal waxaan marlabaad ku celinayaa heshiiska madmadow ayaa ku jiara ee ha la cadeeyo oo Golaha ha loo cadeeyo si inagua Gole ahaan umada ugu cadeyno oo u qancino

Waxaan kaloo ku darayaa halkan waxaa yaala oo Muddo Xiloodkoodii dhamaadey Golihii deegaanka Mudadii hore ee uu dhamaadeyna wax u kordhiyey Golaha Guurtida doorkii dhoweyna umuu kordhin,sidaas darteed waxaa loo baahan yahay in lacadeeyo ileen waa Gole qaran oo la soo doortey , waxaan waajiba in doorashadoodii la qabto ama Golaha guurtidu u kordhiyo, Golaha guurtidu kordhintoodu waa xeer waana mid hir galey meel laga dhaafi karaana ma jirto ayaan qabaa,waxaan odhan lahaa inta aan

mudadu dhaafin  in madaxweynuhu soo jeediyo in Golaha guurtidu u kordhiyo Golayaasha deegaanka ,anigu kama hadlaayo mana odhanayo  golaha guurtidu ma laha eed ama saluug ,laakiin anigu sharci ayaan ka hadlayaa waayo sharigu waxa uu dhigayaa gole kasta oo distuuriya waa in doorashadooda la qabtaa ama loo kordhiyaa hadii kale waxa ka dhalanaya muran sharci

Takale waxaan odhan lahaa Gudida dabagalka Hantida qaranka waxa halkan ka sheegeen in ay jirto deyn 80 milyan ah oo dawladii hore lagala wareeegey, wasiirka maaliyaduna waxba ma sheegin hadaba waa in la cadeeyaa deyntaa gudidu sheegeen , mana fiicna in madaxweynayaashii hore in ceeb  ayna lahayn  la marmariyo, hadaba guddida waxaa laga sugayaa in jawaab ka bixiyaan, waxaan  doonayaa in siteetankaas milyan (80milyan) Golaha loo cadeeyo ,takale mudane gudoomiye  Gudida umaynaan diran in saxaafada wax u sheegaan , Gudoomiha golaha baashe ayaa xildhibaan faarax ku yidh,xildhibaan faarax u soo noqo arimihii geeska ? Xildhibaan faarax ayaa yidhi. geeska waxba igama ku seeyaan ee shaqadeyda ayaan ka hadlayaa

Takale, anagoo ka turjumayna umada reer somaliland waxaa haysata sixir barar caafimaad lacag ah shaqo la,aan iyo waxbarasho lacag ah , waxaas oo dhan ayey la daalaa dhacayaan ,hadaba waxaan soo jeedinayaa in Dawlada iyo inaguba keeno Barmaamujyo Dadka shaqo loogu abuurayo , oo  shaqo la,aanta lagaga baxaayo ,caafimaadka bilaash lagaga dhigaayo waana inaanu siyaasadaas soo jeedinaa,hadii aynaa umadeena siyaasad cad ku hogaamin wax imanaysa in umadu u jeedsato qabyaalad, hadab waxaa loo baahan yahay in xisbi waliba keeno siyaasad cad oo  lagaga baxaayo qabyaalada laguna abuurayo Arimo bulsho, mudane gudoomiye waxaan doonayaa inaan ku soo gaba gabeeyo,  **Arin dhamaan mudanayaashu aan u maleynayo in laga baqay ama laga gaabsadey  waxaana weeye waxaa golaha ka jira guux weyn oo ah wadashaqeynta Golaha  hadaba waa in aynu yeelanaa fadhi xidhan oo arintaa kaga wada hadalo**

**Md. Axmed maxamed diiriye (Nac-nac)** **"2min 58sec"** Bismi  llaahi raxmaani raxiim Mudanayaal waxaan ka hadleynaa xaalada Geeska ka aloosan  dadka meelaha kale siku qaadayana aan ka joojino waxaan leeyahay reysal  wasaaraha Ethoipia ee wada arinka Geeska waxaan odhan lahaa si fiican ayaad u socotaa  isbiidh fiicana waad ku socotaa , anagu Somaliland ayaa nala odhan jirey waqtigii gumaystihii ingiriiska waad maqashey tariikhda in kastoo aanad jiriba , eleteriya iyo  Ethoipia waadigaas heshiisiiyey ee maanta gacanta isku saarey iyagoo intaas oo qof sika diley , waxaa ku odhan lahaa in anaga iyo somaaliya aad na heshiisiisiisid oo arimahayaga aad gashid hadii kale waxaan u arkeynaa in aad dekada berbera indhaha  ku haysid oo aad ciidanka bada aad u sameysaneyso

Takale xaalada bariga ee abaaraha waxaan odhan lahaa aan ku dhawaaqno oo biyo dhaamis samayno ,anigu waxaan odhan lahaa Inagu aan wax la gaadhno oo ugu

horeyno,  waana waqtiga wadanku u baahan yahay in qof jilicsan wax la taageero, ganacsatada iyo shaqaalahana mid walba waxa ha laga jaro.

**Md. Abiibakar C/raxmaan Good** **"9min 06sec"** Bismi  llaahi raxmaani raxiim, xaaladana Geesku maaha mid iska dhalatay ee waxaa xaalad ay dawladahaa waaweynu isku Eryanayaan oo ay ugu waaweyn yihiin Dawlada Maraykanka iyo Dawlada Jaynaha, cidii dooniba ha ku daba jirtee, xaaladanina waa xaalad ganacsi.

kac-dooonadiina waa kuwo ay dawladahaa waaweyni ka danbeeyeen iskuna eryanayeen, iyaga oo ay kac-doonadaasina dhaleen arintaa geeska Africa badashay, ka somaliland ahaan 28sano ayaynu soo joognay oo aynu ku soo jirnay xaaladaa hore ee waa in aynu ka faa'iidaysanaa xaaladan hada socota ee bilaabantay ee ah mida Ganacsiga inaga oo ku naala meel mihiima aduunka waana in aan isweydiinaa sidii aan ugu faa'iidaysan layn.

Waxaanan leeyahay waa in aynaan kuwii hore aynaan hoos taagnaa ama aynaan Dp wold u xidhnaa ee waa in aan jaanis cusub ciyaarnaa xaaladaa ganacsina aan aad ugu faa'iidaysanaa. Waxaa kale oo aan ka digayaa waxaa imanaya wasiiro, waxaana socda isbeddalo lagu doonayo badaha, markaa waxaan ka digaa in aanay ciidami shisheeye aanay iman badeheena.

hadii ay siyaasad xumo ku qabsato geeska afrikana la socon maysid adiguna waad ku dumaysaa, sida aan wada ognahay waxaynu dalka ka dooranay Madaxweyne Isaga oo hada mudo badan joogay hadana waxaad arkaysaa in uu dalkii wali kala qayb sanyahay oo *JEEGAAN* wax la hadal hayo taasina dhibteeda ayay leedahay, waxaa kale oo jirta dhanka diyaaradaha waan ka war qabnay inta diyaaradood ee wadankeena ka bixi jiray iyo hada siday ay tahay, waayo inta uu qofku halkan ka tago ayuu Garoowe u doontaa si uu diyaarad uga raaco iyada oo uu kharash badan ku baxo.

Waxaa kale oo jiray shidaal inooga iman jiran dhankan iyo Ethiopia oo ay ahayd in dawladu cashuurka qaado oo la joojiyay oo hada la yidhi waa kootarabaan isga oo ahaa shidaal jaban oo dadku u baahnaa. Markaa ma shidaalka jaban ee dalka soo galaya ayaa la dagaalamayaa? Halkii laga odhan lahaa alxamdulilaah cashuurna laga qaadi lahaa waa siyaasad xumo ayaan leeyahay aad u daran.

markaa waa in Madaxweynuhu uu dadkiisa ahmiyada siiyaa waayo Madaxweyne kale ma jiro ee isaga ayaa ah madaxweynaha la soo doortay umadana isagaa u dheertee waa in uu wax ka qabtaa arintaa, mida kale waxaa jirta inta uu Madaxweynuhu inta uu meel isasa soo taago wax aan mudanayaasha Baarlamaanka meelahaa ka yidhaado ma fiicna ee waa in uu ka daayaa arinkaa;

**Gudoomiye Baashe:-** Mudane Arimaha Geeska ku soo noqo kabax Madaxweynaha hadal hayniisa

**Md. Abiibakar:-** Gudoomiye adigaa shir-gudoonkii ah ee waa in aad ka hadashaa dhaliilaha.

waa in uu madaxweynuhu la jaan qaadaa xaaladaha iyo duruufa ka socda Geeska Afrika waana in uu dalka ku hagaa meeshii u dan ah, waxaa kale oo jirta baryahana laga hadlaa oo ah in Adis lagu qabto shirar lagu qabto oo ay qabsadaam dad isku isir ahi arintaa yaaan xumaan loo qaadan ee wanaag ha loo qaato, waana in la taageero lana soo dhaweeyaa waana xaalad muhiim ah una baahnayd in laga shiro WCS.

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal "9min 04sec"** Gudoomiyaha, mudanayaasha, saxaafada iyo kaaliyayaasha wasalaamu Calaykum Waraxmatulaahi wabarakaatuhu; waxaan filiyaa mudane gudoomiye in aan hadalka la ii dayn doonin oo la i doca-docayn doono;

**Gudoomiye Baashe;** xildhibaan waxaad ku hadasho ayay ku xidhantahay, Geeska ka hadal.

Wixii aan la doonayn waa geeska ka hadal, waxaana 10-jeer laga baxay laynka oo warkii aan la doonayn ayaa la odhanayaa geeska ka hadal, mudane gudoomiye waxaa fiican xildhibaanka doca-doceeya xildhibaanada hadalkooda in aan digniin siiso hadii uu joogi waayana in aad golaha ka saarto.

Waxaan soo jeedinayaa iyada oo dhawr jeer mawduuca laga baxay oo dhawr mawduuc la qaatay, in arimihii hore Golahan uga baxay hadii ay noqon lahayd Dpwold iyo saldhigaba in golahani uu shir gaar ah ka yeesho, (*hal mudane ayaa ku taageeray*).

Waxaa kale oo aan doonayaa in aan ka hadlo maadaamo oo aad geeska tidhaahdeen, wax ina haya oo kulul oo geeska ka socodaa oo ii muuqdo, hadii ay tahay waxbaa soo kordhay oo tusaale ahaan ethiopia oo nidaamkeedu is badelay iyo sida uu inoo saamaynayo, waxaan u arkaa in raysal wasaaraha Ethiopia oo isku arka in uu yahay nin power-man ah, inta kale ee yaryar isaga ayaa amar siinaya, amrkaana wey qaataan iyada oo aynu taasna aragnay oo waad ka warqabtaan sida uu Farmaajo u kexeeyay ee uu kiiniya u geeyay oo uu lahadal yidhi, sidoo kale isaga oo kiiniya jooga ayuu inaga inala soo hadlay oo uu yidhi farmaajo ayaan soo wadaa oo waatii aynu isku did-nay ee asxaabta, wasaaradaha iyo siyaasiyiintaba la isugu yeedha ee la yidhi maxaynu yeelaa, wixii ka soo baxayna weynu ogsoonahay.

Waxaa weeyi dawlad walba waxay leedahay barnaamij, hadii madaxweyneheenu uu hawl leeyahay oo hawshii laga fara-fareeyo, lana doonayo in barnaamijka la baddelo oo

la yidhaa anaa soo degaya dee taasi nidaamka dawlad nimada meesha ay kaga jirto anigu ma aqaani, waa inay ka mudnaanaa ixtiraamka dawladeena iyo dad keenaba ay leeyihiin weeyi.

Wada hadalka Somaliland iyo Samalia waxaan xasuusnahay iyada oo gudoomiyaha Gakiilada iyo nin wasiir ahi ay xamar tageen oo ay is yidhaahdeen khayriyada ka qudbadeeya oo la shiiday oo ay kabaha ka yaaceen waan u soo joogay. Ninbaa waxaa uu yidh"*allay lehe in teedaan ku sugay Arinka Gaaroodi).* maanta waa arin aan ku sugnay in Golihii sharci dajinta ee Somaliland uu maanta fududaynayo oo uu leeyahay hala wada hadlo wada hadalkaas oo aan dhex-dhexaad ahayn ama aan loo sinayn ee ay tahay "*saca faarso ka-cabay sanduluuu ku iman maalintuu saddex qado*" waa arin aan aad uga xumahay in ay afkooda ka soo baxdo niman xildhibaano ah, waxaa weeyi in wada hadalku uu barnaamij ku tago oo uu golahani ogaado waxa laga wada hadlayo.

Sida marar badan dhacday inta la wada hadlay oo la yidhi waa la is af-garan waayay la soo noqday waa in ayna taasi dhicin ee waa in golahani uu dajiyaa barnaamijka laga wada hadlayo, waxaanan idin xasuusinayaa arinta maanta falastiin sida ay u cakirantahay maxaa keenay wax kalaba ha danbeeyaane waxaad ka wada hadashaan nabadgalyo iyo dhaqaale iyo wax caynkaa ah, taas ayaa inagana inagu socota ee yaanay dhicin ee waa in aynu barnaamij la tagnaa oo ay ahaataa waxaan ka wada hadlaynaa sidii aynu u kala bixi lahayn hadii kala yaan la wadan hadlin oo yaan la isku tagin.

Waxaan idiin sheegayaa in aynu kala taaganahay laba meelood oo iyagu waxay yidhaahdaan midnimadu waa muqadas, kalmadaas oo ah mid aan meesha ku haboonayn oo muqada waxaa ah Jihaadka, laakiin waxay u jeedkoodu yahay lama kala tagayo oo halkaa ayaa la joogayaa, taasina ma dhacayso ayaan leeyahay.

Waxaa kale oo aan idin xasuusinayaa waxaan leenahay wax la yidhaa caadifad oo waxaynu nidhaa Jabuuti waa walaaleheen madaxweynohoodiina inta uu xamar tagay ayuuka khudbadeeyay wixii uu yidhina waad wada ogaydeen halkan kaga celin maayo, markaa waxaan leeyahay caadifada aynu iska dayno ayaan soo jeedinayaa waxaanan leeyahay dad khibrad leh ayaa joogee waa in ay xukuumadu arinkaa ka faaiidaysataa waad mahadsantihiin waanan ka baxay.

**Md. Cabdilaahi Xuseen Cige (Balaaki) "10min 44sec"** Bismilaah**i** Raxmaani Raxiim, Shirgudoonka iyo Xildhibaanadaba Saxaafada iyo Shaqaalaha kaleba waxaanku salaamayaa salaanta Islaamka" Asalaamu Calaykum Waraxmatulaahi Wabarakaatu.

Mudane/ Gudoomiye iyo XIldhibaan waxaa maalmahanba inoo socotay Doodii ku saabsanayd, Isbedelada Geeska iyo xaalada Geeska Africa, sida aynu la socono isbedelka Geeska Africa wuxuu yimid markii Siyaasad furfuran oo aan lagu aqoon ay Ethiopia ee uu la yimid Raisal Wasaaraha Cusub ee Dalkaasi oo safaro taariikhiya uu ku Tegay

Dalalka Eritria oo aan mudo 20sano ah aanu XIdhiidhkoodu wanaagsanayn, Dagaalo Sokeeyo iyo Dagaalona ay ka dhaxeeyeen sidoo kale uu Safaro ku tegay, Masar iyo Suudaan oo ay isku hayaan (Biyaha Niilka).

Iyo Dalalka kale Sida Kenya, Yuganda oo ay xuduudo wadaagaan sidoo kale Dalalka Somaliland, Somalia  iyo Jabuuti, sidoo kale waxaa isna safar ku tegay Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland oo dano dhaqaale iyo mid Amniba uu kala dhaxeeyo Dalka Ethiopia.

Booqashooyinkaa uu ku tegey Raisal Wasaaraha Ethiopia dalalkaas waxaa barbar socdey heshiisyo cusub iyo kuwo taariikhi ah oo danaha Ethiopia ay Gobolka iyo Isbaahaysiga uu ka muuqday kuwaas oo uu ku samaynayay isbedeladaasi ay ka muuqdeen.

Safaradaas oo uu ku kala tegay sida heshiisyadii Ethiopia iyo Elatareya Isbaahaysigii Elatareya iyo Somalia Elatareya kii Ethiopia Kenya iyo Elatareya, Jabuuti iyo Somalia, Ethiopia iyo Somaliland, Elatareya iyo Somaliland iyo Jabuuti iyo Somalia, oo dhamaantood u muuqda kuwo aan weli saldhigin oo uu ka muuqdo deg deg badan.

Isbedaladaas ka socda Geeska Afrika saamayn balaadhan ayay ku leeyihiin marka loo eego dhanka, Amaanka,Siyaasada iyo dhaqaalaha intaba Somaliland hadaba sida ku haboon inay Somaliland u wajahdo isbedeladaasi, ay Ethiopia gadhwadeenka ka tahay waxaan qabaa anigu hadii aynu nahay Bulshada Somaliland,waxaa inala gudboon si aynu ula jaanqaadno dabaylahaa isbedelka geeska ka socda waxa maanta dunida ka socdaa waa laba Arrimood, oo isku gudban fursad Dhaqaale Horumar iyo Iskaashi, Ama dibu dhac bulsho oo Mid dhaqaale iyo mid siyaasadeedba.

Waa inaynu midaynaa aragtideena ku aadan isbedelka Geeska waa inaynu si dhaw ula soconaa sida ay wax u socdaan lana jaanqaadnaa, oo danaha Ethiopia ee Gobolka iyo isbaahaysiiyo u muuqda kuwo aan lugo adag ku taagnayn, in Somaliland u wajahdo isbedelkaasi.

Sidoo kale waxaa isbedeladaasi isna kamid ahaa qayb weyn ama waxtar badan kulahaa somaliland isbedelkii ku yimid Dawlad Degaanka Somalida Ethiopia oo ah halk Gate wey aynu ka galno Ethiopia, ahna xadka balaadhan ee aynu Ethiopia la leenahay Dawlad Degaanka Soomaalidu ka dhisantahay oo mudadii dawlad cusub ee hada jirtaa ay ka jirtay uu ka yimid isbedel farabadan oo balaadhan oo dhinacyo badan leh oo isdhexgalka labada dal dhinaca Dhaqaalaha, Bulshada runtiina mudan mid aynu ku Hambalyayno Dawlad Degaanka Soomaalida Ethiopia hada jirta, mudadii uu isbedelkaasi uu socday, oo Madaxeynaheena ay laba jeer kulmeen labada dhinacba isbedel badanina uu ka muuqdey, waxaan qabaa in aynu ku hambalyayno oo aynu si dhaw ula socono Dadkaa aynu Walaalaha nahay ee Dawlad Degaanka Soomaalida Ethiopia oo ah halka furaha u ah ee aynu Ethiopia ka galno.

Dhinaca kale Arrimaha Shirka Soomaalida iyo Somaliland waxaan qabaa waxaynu leenahay hadii aynu Somaliland nahay Dastuur Cadaynaya ka Hadlaya, waxaynu u taaganahay ama Gooni-Isutaaga Somaliland iyo lasoo Noqoshadeeda.

**Qodobo** Dastuuriya oo aan ka noqosho lahayn, Dawlada Somalia ee aynu ka wada hadlaynaana wax Dastuura oo ay leedahay Ma jirto, Sidoo kale waxaynu leenahay Madaxeyne la Doortay oo **One Man One Vote** lagu doortay, iyana waxay leeyihiin Madaxweyne 325 qof Doorteen.

Shirkasta oo aynu tagno Dawladeena ama Madaxeynaheenu ama Xukuumadeenu waxay gudbinaysaa fariinta ku qoran iyo qodobada Dastuurkeena ku qoran anigu waxaan qabaa dawladu inay meel walba la tagto taagnaato, Muujiso, ka sheegto waxa Dastuurkeenu uu qabo oo ah mid laba taabtaan ah oo aan la bedeli Karin.

Shirkasta oo Somaliland iyo Somalia ku wada hadlayaana waxaa qurux adan inaynu ka sheegano danteena, oo aynu muujino oo madaxeynuhu waxa keliya ee uu gudbinayaa dawladu xukuumadu ay gudbinaysaa waa wax dastuurkeena ku qoran dastuurkuna waxa uu leeyahay waa lamataabtaan.

Markaa inaynu meel walba ka sheeganaa waxaa wax qurux badan oo wanaagsan, oo aynu ula tagno cidwalba oo cida aynu ulategaynaa aynu ognahay inaanay dastuurba aanay lahayn, sheegayaba waxa ka hadlayaba waxaad kaloo moodaa in mudadan ugu danbaysey in wax badani ay iska bedeleen markaad eegto dhinaca Siyaasada ama meeqaamka Madaxweynaheenu Safaradii ugu danbaysay uu ku tegay sida kii Ethiopia iyo kii uu ku tegay Imaraadka Carabta.

Siyaasad ahaan Somaliland waxaa uga soo korodhay wax farabadan oo dunidan ama mandaqadan aynu ku nool nahay, aad moodo in aad dadka marka aad eegto Idaacadaha ama Miidhiyaha Kenya, hadaad eegto Imaraadka, Hadaad eegto kan Elatareya, hadaad eegto kan Ethiopia,laftigeeda in sibadan oo loo dhaadhicinayo qadiyadii Somaliland waxay tahay oo dad badan oo aan ogayni ay hada ku baraarugeen, markaa in safarada la badiyo in aynu dadka wax la qabsano in aynu inagu lasocono wax yaabaha geeska ka socda oo hadba kii dani inoogu jirto siyaasadu Malaha Saaxiib Joogto ahe waxay leedahay Dan-Joogto ah Waayo Ismaaciil Cumar Geele markii uu tegay Muqdisho isla Wasiirkii Arrimaha Dibada ee Elatareya wuxuu ka degay Hargaysa.

Oo aan anigu uba arkayay safarkaa Madaxweynuhu ku tegay oo inaga Faaido badan ay inoogu jirtay markaa in aynu qadiyadeena aynu iibino waxyaabaha geeska ka dhacoo oo aynu si balaadhan ula soconaa dawladeenana aynu ula garab galnaa talo iyo tusaalebana Golayeesheena kasoo baxdaa aad iyo aad baan usoo jeedinayaa Waadna Salaaman tihiin Asalaamu Calaykuma Waraxmatulaahi Wabarakaatu.

**Md. Maxamuud Axmed Obsiiye**“**12min 26sec**” Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Shirgudoonka Xildhibaanada Sharafta leh, Saxaafada iyo Goob-Joogayaasha Golahaba waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka Asalaamu Calaykum Waraxmatulaahi Wabarakaatu.

Run wax badan baan xildhibaanda la qabaa xaga arimah Siyaasada isbedelka ku dhacay Geeska Africa anigu inaan nuxurkeeda sheegaa muhiim ah, wixii tafaasiil ah xildhibaankii iga horeeyaa ayaa soo qaaday laakiin wax walba oo iminka la wado geeska afrika isbedelka ku yimid anigu waxaan aaminsanahay inuu ku salaysan yahay mawqifka Somaliland sidii looga riixi lahaa mawqiskiisa ku salaysan dastuurkiisa iyo aftidiisa aftidii uu qaaday 2000 iyo Dastuurkii ama ha u hirgasho ama yaanay u hirgeline culayska Somaliland la saarayo saamayn weyn ayay ku leedahay.

In la helo in Somaliland iyo Somalia laysku celiyo taasna waxa weeye siyaasada cad ee Somaliland intii 28kii sano ee ay jirtay mar walba waxa ay ku duulaysay Iraadada Shacabka iyo sida shacabkaasi gooni isutaagiisii uu ula soo noqday 18 May 1991-kii, Illaa intaana nabad gelyaa lagu jiray waxaanu aasaasnay habnidaamkii dawladeed dhinackastaba markaad fiiriso Dawlad waa la yahay ictiraafku maaha wax aynu u hanqaltaagayno hase yeeshee yaanay ina ilawsiinin waxyaabaha aynu qabsanay iyo haday dabacsanaan jirto aynu u dabooli lahayn.

Runtii hadafkaa la leeyahay wuxuu ku xidhan yahay sida dadka daraasadeeya Siyaasada ay yidhaahdaan Muraayada Siyaasada Dibadu waa siyaasada Gudaha intaa hadaad ka dhisan tahay ka midaysan tahay jidkii aad umada u jeexday aad ku socoto waxa weeye arimahaaga daakhiligu waa ay hagaagayaan wax kasta oo kaa horyimaadana waad ka hortegi kartaa.

Ayaamahan danbe Somaliland waxaa lagu furay dhibaatooyin fara badan baa ka jirta Gobolada Bari qabaail is dilaya waxaas oo dhan waxay diciifinaysaa qadiyada Somaliland runtii, Gooni-Isutaageena iyo wada jirkeena dastuurkeena iyo dawladnimadeenuna waxay ku dhisan tahay, wada hadal, iskaashi,Isu-Tanaasul iyo qofkii cawda ama dhibaato sheegta oo lala hadlo habkaasaa muujinaya 15 sanadood oo aan Golahan joognayna oo wax yari ka dhiman yihiina Maalin walba waxaanu ka hadlaynaa waa maamul daa-dejin in lasameeyo goboladaas la gaadhsiiiyo wixii ay u baahnaayeen.

Marnaba maskaxdeena kumaanay soo dhicin in ciidan daadejintu ka hormarayso Maamul daadejinta sidaad darteed waxaas dhacayaa oo dhami waxay u dhacayaan sidii loo diciifiyo oo cadawgu uu ka faaidaysto meel ay usoo maraan in ay Somaliland ay diciifiyaan Iraadadoodii iyo wada jirkoodii markaas anigu waxaan leeyahay siyaasada Arrimaha Gudaha.

tii Dibadu waa ay inoo wanaagsan tahay waanu la jaanqaadnay Caalamka iyo Dalalka Deriska ahba inaanu la jaanqaadno oo weliba dardar gelin aanu samayno oo aanu qadiyadeena sifiican usoo bandhigno Dalalka Geeska Africa waa ay ka dheragsan yihiin,hadaan la dafirayn xaalada ay Somalia iyo Somaliland ay ku sugan yihiin.

Hase yeeshee siyaasada arimaha Dibadu waa inay ka qortaa inay dhawr dal uun ay culays saarto waa inay u jeensataa dhinaca dalalka carabta oo aan Imaraadka oo keliya aan laysku halayn hadii laysku haleeyona waa inay iyadu ay dardar geliso sidii siyaasada Somaliland iyo Gooni-Isutaageenu meel uu gaadho oo ay iyadu wakiil ay ka noqoto sidii ay iyadu meel u gayn lahayd hadafka aanu usocono oo aanay arinkeenu noqon sidii kii carabka ahaa ee yiri (Inii Asmacu jacjaca walaa anaa daxdana )

Markaa waxa weeye taa in laga gudbo oo wixii aan maqalno in ay noqoto waanu taageersanahay iyo waanu garab istaaganahay waa in la helaa wadooyin farabadan oo ay furan dalka gudihiisa ay yimaadaan oo ay qunsuliyad ay ka furtaan safaaradaha wax qabadkooduna mid muuqda uu noqdo dalalka carabta ee kalena waa in wado loo sameeyaa ama iyaga hala maro ama kuwo kale hala maro dalalkii aduunka iyada laftigoodu xidhiidhka aanu la leenahay dalalkaas ISkadaneefiya in la xoojiyo halkay ka taagnaayeen qadiyada Somaliland.

Qadiyada meel fiican bay ka taagnaayeen iminkana waa ay ka taagan yihiin halkaas in laga sii wado oo culayska la saaro waa wax loo baahan yahay kolayba anigu dhaliil uma hayo.

Wasaarada khaarajiga iyo siyaasada Arrimaha Dibada Somaliland mar waliba waxay ku dedaalaysaa sidii ay u dhaqaajin lahayd qadiyada Somaliland waxa keliya ee hortaaganina waa duruuf bulshadu ay kow ka tahay oo ay ka tahay daruuf caalamiyan ah oo ku xeeran ayuunbaa hortaagane wixii kale ee dadaal ah waa ay geysteen halkeena aynu kasii wadno baan leeyahay.

Qadiya u waynee Arrimaha Dibada ee saamaynta weyn ku leh waa heshiisyadii Itoobiya, Elatareya iyo Somalia waxa weeye culayskeedu waa wada hadalada.

Wada hadalada lama diidana soomaalidu waxay tiraahdaa (**aynu wada hadalno waa aynu heshiino)** waxa meesha taalaa waa horta maxaa lagu heshiinayaa ayaa meesha taala, si kastaba ha ahaatee waanu soo dhawaynaynaa wada hadalada.

Hase yeeshee qadiyada Somaliland waa qadiyad mar walba u taagan inay si nabad gelyo ah ay mar walba u hesho madaxbanaanideeda hadii la rabona nabad dhinaca kalena waa inuu nabadaas qaataa, waana inuu qaataayoo oo uu is hortaagaa wax walba oo khalkhal iyo dhibaato gelinaya oo aanay Somalia noqonin Nabadna waan rabaa dalkii somalilandna waanku duulayaa waa inaanay noqonin.

Markaa waa in la helaa labada dhinacba inay nabad gelyadii ay ogol yihiin oo midwaliba meesha uu u taliyo uu u madaxbanaanaado, kabacdina wadahadalkuna waa inuu midho dhalaa waa suurto gal haday.

Hadii Siyaasada Arrimaha Gudaha oo muraayad u ah kuwa Dibada, wax yar ka taabto waxaa muhiim ah adkaynta Nabad gelyada, iyo Nidaamka Dawlada maamul daadejintiina waa muhiim cidii cabanaysa gaar ahaan iminka qadiyada taagan ee Sanaag bari in maamulka la daadejiyo oo ciidamadaasi xali maaha in la yiraahdo ciidamo uunbaa la dulkeenay iyadoon dadkii Madax-dhaqameedkii Siyaasiyiintii Wax-garadkii beelahaas aan lagala tashan ama la talo gelin.

Sidaas darteed arintaasi waa arin xasaasiya 5-tii beelood ee Somaliland ku midawday mid kamid ahi hadii ay cabasho la timaado waa dhibaato ay dareento waa wax dhantaalaya midnimadii Somaliland.

**Soo Jeedin:-**

markaa anigu waxaan soo jeedinayaa in gudi ka kooban labada Gole ee Baarlamaanka iyo Xukuumadu inay kormeer ku tagaan halkaas oo ay qadiyada Somaliland iyo waxa ciidankaas sababay geyntooda in la sharxo oo Qabaailkii, madaxdhaqameedkii iyo Siyaasiyiintii dhamaantood iyagoo u dhan ay kawada hadlaan arinta anigu ma dareensani inay beelahaasi ama beesha halkaas degani ay diidsan yihiin Somaliland laakiin waxa ka dhex-shaqaynaya waa Siyaasad kasoo horjeeda Somaliland waa inayna Somaliland wixii ay ku caano maashay yeeshaan oo wada jirka iyo Nabadgelyada ilaalisaa oo ay la hadashaa hadii ay wax tirsanayaan nidaamka adkayntiisu iyadoo colaadahaas lasoo afjaro dhamaantood waa wax ku wanaagsan anagana xoog noo yeelaysa.

Geed gaaban iyo Geed-dheerba waa inay xukuumadu ay u fuushaa sidii loo heli lahaa nabad gelyadaa, loo sugayo waxaanu ku faanaa inuu dalkeenu nabadgelyo leeyahay in uu xasiloon yahay waa waxa keliya ee aynu iibgayno oo dee aduunka iyo caalamkoo dhana ay garawsan yihiin isuna taagayaan markay arkaan xaalada aanu hayno.

Hadii maamul daadejinta lala yimaado waxaa muhiim ah xagan Somaliland xaga xeerarka iyo dhaqan galka Dastuurka inaan lagu tuman, oo dastuurka waa waxa kala hagaya hadaan saddexdan dhardhaar ee Dawladu ka kooban tahay waa in shuruucdii dhaqangalka ahaa inay xukuumadu ay tixgeliso oo aanay ku xadgudbin isla markaana wax allaale iyo wixii uu Dastuurku uu jideeyay ay Wasiirada iyo Xukuumaduba ay dhawrto waayo waxaa taas ku jira adkaynta nidaamka dawladeed ee Somaliland waa waxaan dawladnimada aan ku nahay.

**Soo Jeedin,** Sidaas darteed waxaan soo jeedinayaa iyadana lafteeda in la tixgeliyo dastuurka iyo qawaaniinta maadama oo uu yahay wax inoo dhex ah ee aynu u baahanahay inaynu xoojino labadaas soo jeedin ayaan soo jeedinayaa.

**Md. Maxamed X. Xuseen Ciise "25min 04sec" Bismilaahi** Raxmaani Raxiim shirgudoonka sharafta leh, mudanayaasha sharafta leh, shaqaalaha, iyo Saxaafadaba waan salaamayaa ASC, salaan ka bacdi waa maalintii saddexaad oo waxaad moodaa in badan la hadlay, hadaa aan gudo gabo arintan laga hadlayay oo ah arimaha Geeska Afrika oo ay somaliland ka mid tahay kana mid ahaan doonto wixii soo kordhaana ay saamayn ku yeelanayaan.

Ilaa dagaalkii qaboobaa waa meel lawada ogyahay in ay muhiimtahay, oo wadamo badanina ay danahooda ku ilaashanayeen ay ka mid ahaayeen Ruush iyo maraykanba.

Waxaa la yidhaa baabal-mendab waxaa maraya maraakiibta aduunka 50% iyo Badeecadaha aduunka u kala goosha sidaa awgeed waxay noqotay cidkasta oo ay arimo kaga xidhanyihiin ay isha ku hayso.

Markaa aad eegto marka ay saxaafadaha caalamku sheegayaan waxay yidhaahaan, Dagaalka Geeska, Isku haynta Geeska, cidhiidhiga Geeska marka aan intaas ii dhan aad eegto waa meel uun lagu tartamayo indha caalamkuna ay hayaaan, somaliland-na arimahaa ayay wax ku leedahay waayo hirdan badan ayaa ka jira meesha hadii ay ahaan lahayd Reer-Galbeedka oo ay Carabi la socoto, China, Ruushka, Iran iyo wadamo badan oo iyaguna dhinacooda kaga jira, markaa ninka ugu xariifsanina waa Ninka danahaas oo dhan isku haya.

Markaa somaliland waxay dantu ugu jirtaa in aynu noqono dad indha furan oo xaaladahaa qiimayn karaa ama la socon karaa ay jiraan weeyi, oo arimahaa gorfayn karaa waa in ay dadkeena siyaasiyiinta ah ama dadkeena Aqoon yahan ka ah  ku jiraan, kana soo saaraan talooyin wax ku oog ah, oo Goleheena laftiisu yaanu iska hadlin uune ***waa in ay qodobo ka soo baxaan xukuumada loo gudbiyo isaga oo go'aan Gole ah.***

Dhan kale isbadellada Geeska ee aynu ka hadlayn run ahaantii hada ayuunbaa lagu baraarugay oo isbadelkii ka dhacay Ethiopia ayuun baad moodaa in dadku u baraarugeen, laakiin wadamada qaar ayaa mar hore sii bilaabay sida wadanka China oo Reer galbeedka uga horeeyay isbadaladan socoda oo wadanka Suudaan isaga ayaa shidaalka u soo saaray, ethipiadan lafteed wax badan ayuu ka qabtay, lakiin markii uu Raysal wasaaraha Ethiopia Abiye Axmed markii uu bilaabay dhaqdhaqaaqa ayay indha caalamku ku soo jeesteen ee run ahaan wuu ka horeeyay isbadeladu.

Sida aad la wada socotaan arimaha geesku iyaga oo degan ayaa waxa uu baddelay Majarihii uu geesku u socday waayo Ethiopia iyo Eritria heshiis may ahayn, Eritria iyo

Jabuubti heshiis may ahayn, Somalia iyo Ethiopia xidhiidh koodu ma fiicnayn ee isagaa dhinac kale u rogay arimahaas oo dhan. taas ayaana keen tahay in dadbadani maanta ay doodo ka yeeshaan oo uu wadan waliba uu danihiisa ka eego, oo intii ay colaaduhu ka jireen Ethiopia iyo eritria Ciidamo ayaa isku hor fadhiyay labada xuduudoon oo dhaqaale ayaa ku baxayay laakiin maanta heshiis ayaa ka dhacay oo dhaqaalihii ku baxayay waxaa loo baddelay horumar iyo daneheeda hoose, Eritria lafteedu waa sidaa oo jeel ayay ku jirtay waana laga furay oo waataa dhaqdhaqaaqaysa ee Somaaliland soo gaadhay ee doonaysa arimaha Geeska inay dhinaceeda ka qabsato.

Jabuuti waa sidaa oo kale oo daneheeda ayay ilaashanaysaa sida uu wadan walba uu dantiisa u ilaashanayo, oo uu eegayo in uu iska ilaaliyo wixii dhibaataynaya, sidoo kalana uu eegayo wixii ay faa'iido ugu jirto, Somalilandna waxay ka mid tahay wadamadaa danahooda ka ilaashanaya arimahan Geeska Africa.

Somaliland Maxay ka rabtaa arimahan Geeska? Xildhibaano badan ayaa ka hadlay, aragtiday markaan eego Saddex arimood ayaa ugu muhiinsan:-

1. Fursado ay daneheeda siyaasadeed ay ku soo bandhigto qadiyadeeda gooni isku-taaga weeyi.
2. Daneheeda Dhaqaale inay ku ilaashato oo ay ka faa'iidaysato isku furnaashaha uu keenayo is-beddelku.
3. Danaheeda Amni inay ilaashato iyada oo la fal-galaysa Dalalka Geeska iyo Quwadaha daneeyaba.

Marka aad eegto Somaliland maa meel amaana oo ay shacab iyo dawladba ay ilaashadeen marka laga reebo arimahaa yar yar ee dhankaa Puntland ka socda mooyaane oo u baahan in la xaliyo sidii ay Somaliland qaadatay ee ahaa waxaanu doonaynaa jaar nabad ku wada noolaada, wixii la kari waayana waa la iska celinayaa waa siyaasada Somaliland. Sidoo kale dadka Somaliland ee gobalada kala duwan degan waa in aad looga warhayo.

Somaaliland iyo Somaaliya xidhiidh ka dhexayn karaa waa in uu noqdaa sidii loo wada hadli lahaa waana in laga shaqeeyo si ay nabadi ku jiro ay u kala bixi lahaayeen loona kala Faataxaysto weeyi, waayo weynu ognahay Somaliland qadiyada somaliland halka ay ka taagan tahay, sida ay Doorkan somaaliland Qaadatay oo ay anaka yaan la isku kaayo daynine waa in la helaa cid dhex dhexaada.

Niman siyaasiyiin ah ayaynu nahay ee ictiraafka somaliland maaha mid (unique) gooni ah oo wadamo badan oo aan la aqoon sanayn ayaa jira sideenaa iyo kuwo la aqooon sanyahayba, laakiin Somaliland waxay ku tahay kaligeed oo aan cidina la wadaagin, marka aynu ka hadlayno aqoonsi waxaa bixiya dawladahaa UN-ka lakiin waxaa dhacda

mararbadan oo iyada oo aanu UN-tu aqoonsan uu wadan kale aqoon sado, waxaana la yidhaa waa saddex xaalo.

- In wadankaa UN-ta Xubinta ka ah uu ku aqoon sanyahay;
- Ama in UN-tu Dawlad nimadaaha ogoshay oo ay ku aqoonsatahay
- In wadan aan la aqoon sanayni uu aqoon sado wadan aan la aqoonsanayn.

Markaa somaliland cid aqoon sani mar jiro oo wadanka inagu xigaa waa waqooyiga Qubrus oo uu turkigu uu ka gooyay markii uu ku duulay 1970 isga oo dadka Turkiga ah ilaalinaya waa kii sidaa dawlada ku sameeyay uuna aqoonsaday iyada oo aanay cid kale aqoonsanay isaga oo UN-ta Qayb ka ah mooyaane wax kale oo ay inagu dhaafeen ma jirto.

Waxaa kale oo jiri karta ama ay wadamada reer galbeedku yidhaah-daan wadankii somalia ee aad kala go'ayseen wada hadla, taasina waa been oo tusaale ahaan wadanka la yidhaa Kosafo waxay ka mid ahayd wadankii la odhan jiray Seerbia, sideena ayuun bayna ahayn laba wadan oo isku tagaye, xataa kosofo waa kalmad ka mid ah afka seerbiyaanka, seerbiya may ogolayn in ka go'aan lakiin danaa laga dhex arkay waxaana loogu dhawaaqay in go'aan 17-february-2008 waxaana ku dhawaaqida ugu horeeyay EU-da oo dhan, turkigan ayaanu ugu horeeyay wax ictiraada oo 18-kii aqoon saday maalin ka dib markay gobonimadooda ku dhawaaqeen, waxaa kale oo isla maalintaa ku dhawaaqay ictiraafka Egland, USA, iyaga oo eegaya danahooda siyaasadeed iyada oo aanu wali ictiraafin wadankii ay ka go'een, waana in ay maskaxda ku hayaan siyaasiyiinteenu in taasi jirto.

**Wadamada ictiraafa kosovo waxaa kamid ahaa:-** Turki, UK, USA oo ictiraafay 18-02-2008-kii, UAE, waxay ictiraafeen 20- 03-2009-kii, Jabuuti waxay ictiraaftay 08- 05- 2010-kii, Somalia waxay ictiraaftay 19-may -2010-kii, waxaa kale oo la mid ah wadamadaa aan soo sheegay, Qatar, Masar, wadamada geeska Ethipia ayaanan ku Arag, markaa waxani waa dano siyaasadeed ee waa in hadii ay somaliland hesho cid ictiraafaysa oo dano ka leh waa in ay aqbashaa oo ay la xidhato.

Markaa arinta somaliland waa i nay sidaa u soo bandhigtaa oo la ina dhex joogo weeyi, waa in midna maanka lagu hayaa hadii ay arinteenu noqoto Dhex-dhexaadin waa in ay siyaasiyiinti marwalba la socodsiiyaan halka ay wax marayaam waxaana soo bixi kara saddex shay.

1. in labada dhinac ee la dhex-dhexaadinayaa in uu midkood Guulaysto midna laha guulaysto.
2. In wada hadalkuu uu burburo oo aanu midkoodna Guulaysan iyo.
3. in uu midba midka kale ku qanciyo in uu ka tanasule waxa uu wato.

Markaa dhex-dhexaadinta dhaqankeeda waxaa ka mid ah in la isku jiidh-jiido waa in somaliland-na team xulataa uga qayb gala oo aad iyo aad ugu ja-jaban arimahaa oo ay hadii ay noqon lahayd arimaheeda dhaqaale, arimaheeda Amniga, dhanka arimaha gudaha aad ayuu xaalku udagan yahay ee waa in laga shaqeeyaa sidii loo xoojin lahaa, isku tanaasulka iyo cabashooyinka wixii jira oo la xaliyaana waa muhiim WSC.

**Md. Maxamed Cismaan Maxamed (Bulqaas)** **"9min 04sec"** Marka hore waxaan salaamayaa shirGudoonka iyo Mudanayaasha waxaan doonayaa inaan ka hadlo Arimaha ka taagan Gobalka Sanaag,weli waxaa ka taagan dhinac Bariga ee Sanaag go,doon Dawladeed ,sidaas dhowr jeer oo hore aan sheegey in Deegaankaasi inuu ka calool go,ay Dawlada Somaliland,dhowaan waxaa ka jirey shaqaaqooyin Ciidan , oo Ciidamo ayaa la geeyey Degmada Yuuba ,Dadka Deegaankaasi waxa ay ka hor yimaadeen qaabka ay u yimaadeen Ciidamadu Deegaankaas,Ciidamo aan Deegaankooda ku tirsanayn,

Sidaas darteed in Ciidamo la raro oo Deegaamada Bari ee Sanaag la geeyo waxaa ka horeysa in Maamul fidin badan la sameeyo, iyo waxqabad ama Horumar loo sameeyo Deegaankaas si Dadka loo tuso in ay Dawlada Somaliland ka tirsan yihiin, Jabhada Caare waxaan u arkaa in sidii loo baahnaa wax looga qaban ,oo ay ahayd in wada hadal rasmiya loo furo oo waxay tabanayaan laga shaafiyo,waa in ala bedelo siyaasadii hore oo mid cusub lala yimaadaa ,waxaan Saxaafada ka maqlaa in Ciidamo hore leh ku biirayaan Jabhada Caare, dhowaan ciidamo ka soo goostey dhinaca Caare ayaa waxa ay yimaadeen deegaanka Yuuba oo ay u dhasheen, Xukuumada Soomaliland way qaabishey waan soo dhoweysey ,waana muddo ilaa sadex bilood laga joogo,Ciidamadaas yuuba yimid ilaa hada way Joogaan lamana habeyn baahiyahoodiina way taagan tahay weli,

Degmada yuuba waxa Degmada la siiyey ilaa dhowr iyo toban sanadood ka hor waana Degmada ugu dhow magaalada ceerigaabo,waxay u jirtaa 40 km waxa maamul ah oo ka jiraana ma jirto ,waana Magac u yaal, lama siiyo kabkii ay u baahnayd,Degmada ka shisheysana hadalkeedaba daa,waana bilaa maamul, hadaba waxaan soo jeedinayaa in ciidamada labada dhinac ee is horfadhiya Somaliland iyo Putland in dib loo kala qaado ama la kala raro , fadhiisimahoodiina dib loogu soo celiyo,wada hadalna waa in lagu dhameeyo

Bariga Banaag 80% waxay ay taageersan yihiin Dawlada Putland, inay sidaas noqdaana waxa ugu wacan Dawlada Somaliland oo dhegaha ayey ka fureysatey,sidaas dartee yaan la sheegan inay Somaliland yihiin ama ka tirsan yihiin,Eleteriya inta lagu meeraysanayo oo la sugayo citiraaf dhow waxa ka muhiimsan in la hagaajiyo Gudaheena dayacan ayaa Citiraafku yaalaa, hadaan ka hadlo Arimaha Debada anigu waxaan odhan lahaa waa in ta dhaxdeena la saxaa waxyaalo badan oo qabyo ah oo dhexdeena yaala ayaa jirta oo ah madmadow aad u baahsan , hadaba waa in Soomaliland Gudaheeda, waxaan

odhan lahaa waa in laga saaro wixii aan fiicneyn, marka la helo Soomaliland oo dhaxdeedu midnimo ka jirto ayaa haboon in aynu la hadalo somaliya arimaheeda , anigu mudane gudoomiye waxaan soo jeedin lahaa, intaas ayaanan ku soo gabo gabeyn lahaa

**Md. Maxamuud Jaamac X. Cilmi (Dable) "18min 36sec"** Bismi llaahi Raxmaani Raxiim horta anaa hadhay looma hadlo , anigu waxaan la yaabanahay waxa aynu isnidhaano xagee la geynayaa , ileen lecture jaamacadeed kuma jiree, mar hadii inaga iyo dawlada naga dhaxaynin xadhiidh fiicani sida distoorku sheegayo, taasi waxay noqonaysaa mushkilada meesha taala , anigu waxaan odhan lahaa in sadexda dhadhaar ee dawlada ka kooban tahay waa in ay mushtarik ku noqdaan, madaxweyne cigaal hadii uuna ciidanka qarameynin oo loo yeedhin Isimadii cuqaashii iyo odayadii wada lahaa soomaaliland waxba nooma dhismeen hadii aan laqaban dib u heshiisiintaa, soomaaliland maanta may jirteen, waxaanan u maleynayaa inuu ahaa qof ilaahay noo soo direy (waa madaxweyne cigaale) isgaana nuugu horeeyey dawladnimo distoor lacag iyo ciidan Somaliland leeyahayba,imika hoos ayuunbaan u sii soconanaa, aleylehe ninkii ina riyaale ayaa waxbadan ka qabtey ciidamada amniga gudaha iyo ciidamadii uu si fiican u dhisey, arimahan gudahoo la dhiso ayaa khaarajigana wax laga qaban karaa,

Anigu waxaan odhan laha wasiirka daakhiliga iyo wasiirka difaaca haloo yeedho, si Arintan sool iyo sanaag nooga waramaan, waayo umad naga tirsan ayaa ku nool kuna dayacan goboladaas, takale anigu waxaan odhan lahaa dawaladan waxaa doortey umada saomaliland oo dhan sidaas darteed uma baahnin in la yiraahdo jabhad ayaa maalinba meel soo gashan , anigu waxaan odhan lahaa hadii aynaan meelaha jabhadu fadhido ugu tegey aynu xadkeena ilaashano, dhinaca kale guurtidu iyadaa qaban jirtey arimahaas nabad gelyada imikana lama hayo door ay ka ciyaarayaan, hadaba anigu waxaan odhanlahaa sidii xildhibaankii iga horeeyey marka aynu sugno amaankeena yaan khaarijigana wax ka qaban karaa,waayo waain aynu ilaashano dhulkeena waayo shaley suuriyaa laga qaadey buurahoodii ,

**Md. Axmed Cabdi Nuur (Kijaandhe) "11min 20sec"** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiye aad baad u mahadsan tahay in aad I siiso fursadan. Xildhibaanada soo xaadiray Golaha aad iyo aad ayaan u salaamayaaa. Runtii aynu ka hadlaynaa arrin muhiim ah weeye. Isbedelada ka socda Geeska Africa in aynu dhug u yeelano waa arrimo muhim ah, sababta oo ah saamayn ayey inagu leedahay. Runtii dad badan oo iga horeeyey ayaa waxay ka muujinayeen wer-wer, laakiin anigu wer-werkaa ma qabo.

Waxa weeye intan Africa uun maaha, is bedelo kale ayaa ka socda wadamada Carabta, Carabta laftoodu waxay inagu leeyihiin saamayn badan oo waxa jooga dad badan oo ka soo qaxay Yemen, qaar Suuriyaan ah ayaa jooga, markaa runtii wax farabadan oo intaa

aynu arkayno ka badan ayaa inagu xeeran, intuba saamayn ayey inagu leeyihiin, taasi taas weeye.

Haddii aynu dib ugu noqono taariikhda Somaliland, Somaliland runtii intii ka horaysay israacii 1960 intii ka horaysay Somaliland waxay geeskan ka ahayd (Major Political player). Taas waxa u yaqiina labadii dagaal ee adduunka ayey ka soo qayb gashay, xoogagi adduunka ayey la mac ahayd meelo badan ayey la qabsatay, markaa waxay ka ahayd Geeska Africa dalalkii xadadka sameeyey ayey qayb ka ahayd ayaan qabaa, maxaa ka mid ah. Waxa ka mid ah israacii koonfurta Somaliya iyo Somaliland.

Hindisaha waxa lahayd Somaliland oo ah in Great Somaliya la isu keeno waxa lahayd Somaliland oo Ingiriisku qabsashadii uu qabsaday Kenya runtii hadaynaan fududayn oo Somaliland dad ka socdaa aanay fududayn Ingiriiska umay suurto gasheen.

Xoriyadii Jabuuti runtii hormood ayeynu ka ahayn in Jabuuti ka kaco faransiisku, markaa runtii 1960 wixii ka horeeyey ee dagaaladii 1aad ee adduunka intii u dhaxaysay dagaalka 2aad Somaliland waxay ka ahayd xubin fir-fircoon Geeskan Africa siyaasadihiisa.

Waxaan arkaa oo aniga ii muuqata in taasi soo noqonayso oo aynu ka maqnayn 35 sanno stage-kaa siyaasadeed ee Geeska ka maqnayn oo markii aynu ku darsanay Somaliya ayeynu ka baxnay magtabkaa iyo heerkaa aynu taagnayn, markaa wax wer-wer ah ma leh, waxaan arkaa in ay soo noqonayso magtabkii iyo heerkii aynu kaga jirnay Geeska Africa.

Markaan u soo nqodo Isbedelka ka socoda Ethiopia, runtii muhim wayn ayuu inoo leeyahay. Ethiopia waxay maraysaa xaalad adag oo is bedel ah, nidaam ayey ka guuraysaa oo nidaam ayey u guuraysaa waa dal weyn weeye. Hortu waynu u ducaynaynaa in si nabad ah ay isbedelkaa kaga baxdo oo isbedelkaa fur-furan ay gaadho.

Shalay waan dhagaysanaayey in kasta oo aanu Cabdiraxmaan joogin doodiisii ayaan dhagaysanayey iyo Rag kaloo halka ka hadlay aad baan uga naxay waxay ku hadlayeen ee ay lahaayeen, halkan kuma celin karo, laakiin waxay ahaayeen runtii qaar uga naxay oo aan u fiicnayn sumcada Somaliland iyo dalkaba. Waxa weeyaan inagu waxaynu doonaynaa isbedelka halkaas ka socdaa noqdo mid iyagana anfaca inaga ina anfaca, ma doonayno inuu noqdo mid xun oo keena astaamo xun, sababta aynu ugu dhiiranahay (Involved) dee waana inaloo yimid oo dadkii inoo yimid in waxoogaa sooryo ah la siiyo inuu meelahaas kaga dhawaaqo dhaqankeenii ma ahayn. Markaa is bedelku waan soo dhawaynaynaa oo waxaad moodaysay in taliskii hore eek a jiray Ismaamulka Somalida Ethiopia uu Somaliland cunaha uu hayey oo haddii Eebe bedinkeeda leeyahay in baayac mushtariga la fur-furo wax badan oo faa'iido ahi ku jiraa. Ethiopia dhul ayaa isugu keen yaala oo dano badan ayaa inaga dhexeeya oo haddii dhul isugu keen yaalo waa dad uu jidhkoodu isku yaalo ii isla damqada, markaa runtii waxaynu nahay dad ay tahay in ay ka wada shaqeeyaa dhibaatada jirta ee nabadgelo xumadu kaw ka tahay.

Waxaan ku daraaya arrimaha Putland, Putland waa walaalaheen oo waxaynu nahay jaar waxa inaga dhexeeya wax badan, laakiin marnaba ka yeelin mayno xadkaasi ma jiro iyo in ay soo farageliyaan, ka yeeli mayno amaahin mayno, yaanay indhaha iska ridin xadadkaas yaala maanta ayey Africa ku kala joogtaa kaasaynu nahay, haddii ay taasi anfici waydo wixii ay ka helaan ayey leeyihiin.

Xalay waxaan dhagaysanayey nin waddani ah oo hadlayey ciidamada tagay barriga dhulka bariga, runtii sababahay ay u tageen waxay noqotay meel ayey ku hirdamaan ISIS iyo Al shabaab, waa dhulkeenii in markaa nabadgelyaddiida la soo celiyo waxaan u arkaa inay aad iyo aad muhiim u tahay.

Waxa halkaas ka soo duula Xaare mise Caare ninka la yidhaahdo oo sheegayanay inuu yahay jabhad ka soo horjeeda Somaliland. Runtii aad iyo aad ayaan ugu hambalyeynayaa dawlada Somaliland iyo ciidamadeedu inay halkaa ka saraan oo nabadgelyadeeda soo celiyaan. Waxay dan u tahay dadkeena meesha joogaa ee kolba qaar is eryanayaan isla jiidhayaan, markaa taas runtii ito aad iyo aad ayaan u soo dhawaynayaa.

Runtii waxa inala jooga dad badan oo carab ah oo baayac mushtarka iyo danno badani inaga dhexeeyaan ayaa jooga oo qaxoonti ha, kuwaas laftoodu xaqa weyn ayey inagu leeyihiin waa in la siiyaa nabadgelyo, waa in la ixtiraamaa oon soo dhawyno, waxaan dawlada u soo jeedinayaa in ilaa 10,000 oo qoys oo Suriyiin ah ay dib dejin u samayso sida dawladaha kaleba ay ugu samaynayaa, runtii waa inay fursadaa ka faa'iidaystaan waa dad ay inaga dhexeeyeen wax badani taasna waan ugu baaqayaa.

DP world aad iyo aad ayaan ugu mahadcelinayaa fursad weyn ayuu inoo sameeyey. Anigu khamiistii dhawayd ayaan kai mid magaalada Berbera is bedelka ka muuqda aad iyo aad ayaan ugu farxay is bedelka ka muuqda malaha muddo sanad ah maan tagin. Nimada dawlada hoose jooga ayaan waraystay oo aan ku idhi waa imisa dakhliga cashuuraha ah ee soo galaa boqolaal kun oo dollar ayey ii sheegeen inay meesha soo gasho, waxaas oo dhan waxay la socdeen DP world ninka Maayirka ka ah Ilaahay waxaan ka rajaynayaa in maayirada inooga dhigo kaas oo kale waanan uga Mahad celinayaa.

Waxa ku soo gebo-gebaynayaa is bedelka geeska ka socdaa wuu ina saameeyaa togan yahay waanu wanagsan yahay baqasho ma leh, waa inaynu kaalintaynu lahayn ciyaarnaa intaas ku soo gebo-geeyey ASalaamu Calaykum Warax matulaahi wa barakaatu.

**Md Xasan Xuseen Shide** **"3min 10sec"** Shir-guddoonka, xildhibaanada, saxaafada Waxaan idinku salaamaya Salaanta Islaamka ASalaamu Calaykum Warax matulaahi wa barakaatu, Salaan ka dib, hadalka rag badan baa iiga horeeyey wax badan oo aan odhan lahaa waa la yidhi, ku celcelintiisuna qiimo badan ma samayso, laakiin markaan

fikirkayga ka dhiibto is bedelka geeska. Waxaan aaminsanahay in Somaliland Abey Ahmed uga horaysay is bedelkan oo iyadu bilawday laba sababood awgeed.

Cadaawad ayaa jiri jirtay ka dhexaysay Ethiopia iyo dalkii la isku odhan jiray Somalia oo ay dhul isku haysan jireen oo amaan iyo nabadgelyo ayeynu ka samaynay oo jabhadeenii way joogtay oo dadkeenii way ku qaxeen oo dawlada Ethiopia halkaas way ka nasatay oo aamin ayeynu ka samayay.

Mar labaad waxaynu bedelnay Maapkii geeska Africa oo dal Somalia la isku odhan jirnay oo aynu ku ceshanay sidayn ahaan jirtay 1960 is bedel kalena halkaas ayeynu ka samaynay. Waxa kale oo aynu la jaan qaadnay is bedelka Bulshadeena iyo kuwa kilarka oo walaalayn fara badan ayeynu samaynay. Rasalwasaaraha Ethiopia markii hore indhaha wuu inaga laliyey, laakiin markay runtu runtii timid kuxuu inoo arkay in aynu nahay dad aan laga maarmi Karin oo is bedelka geeska haddii aanay qayb ka noqin waxba aanay ka soconayn. Sidaasna waan aaminsanahay Madaxda geeska Afrikina inay ku naqacsan tahay waan filayaa, waana u dadiil ah wufuudan is way daaranaysa ama Ereteria ka yimaada ama geeska meelo kale ha ka yimaadaane.

Markaa inaynu si waagsan uga faa'iidaysano weeyee, ictiraaf la'aanta tuunbaa indho ka lalinta keentay, laakiin sidaas ayeynu ku ictiraafsan nahay oo Ilaahay ayaa ina citiraafay sideenaas ayeynu qanacsanahay oo aynu ku adag nahay sidaas ninkii inagu ogol waan la jaan qaadaynaa kii aan inagu ogolayna waxba inama yeelayo.

Is bedeladan Kilarka iyo shirarkani saamayn ayey inagu leeyihiin dadkeenii ayaa ku nool waxaynu nahay laba dal oo daris ah oo ay shacabkoodii isku mid yihiin Dawlad Deegaan Somaalida Ethiopia iyo Somaliland dad isku wada mid ah weeyaan aayo ka tashigoodana xor ayey u yihiin wixii shirar ka qaybgelya iyo siyaasadood inay faraha ka qaadno oo aynu nabadgelino weeyaan.

Barriga waxa ka jira biyo la'aan iyo Abaaro gurgiina dib ayuu inooga yara dhacay, halkaa dawlada waxaan ku gubaabin lahaa gurmad deg deg ah oo biyaha iyo dadka maatida ah sidii loo caawin lahaa. Ciidanka soo maalin ee halkaas tagay markii dus duskii batay xaq weeyaan in dalka xuduudihiisa la difaaco inaga oo cidna gardaraysanayn dagaalna kicinayn taasna waan raacsanahay hadalka sii badin maayo inahaas ayaan ku soo koonbayaa salaamu Calaykum warax matulaahi WA barakaatu.

**Md Cabdiqaadir Jaamac Xaamud "5min 15sec")** Shir-doonka, Mudanayaasha, Martida iyo Saxaafadaba waan salaamayaa, salaantaa dabadeed xaalada dalka ee ciidamadaas la geeyey meesha, markaa dhib maaha Ciidamada waa la gayn karaa meesha, laakiin wax aka horeeya imkaaniyaadii dadku u baahnaa in la geeyo meesha in badan waan ka hadalnay oo waxay xaq u lahaayeen la geeyo oo degmadood kale maamulkeeda la daadejiyo Wasiirka arrimaha Gudaha, Wasiirka Caafimaadka, Wasiirka Waxbarashada waxay xaq u laahyeen meesha la geeyo.

Haddii ciidamada la geeyo dhib male oo horaan uga hadlay oo Mudanihii meeshaa laga soo doortay wax laga waydiiyo xaqbaan u leenahay, xitaa naga ayaan in fahansiinay oo Tilifoon isku fahansiinay dadka iyo Ciidmada lama ogayn Ciidamadu si deg deg ah ayey meesha ku degeen, dadka naga qancinay oo nidhi waa ciidamadiinii u dul qaata, laakiin wixii baahiyaad ah xaq bay u leeyihiin in loo geeyo waa caadi.

Wasiirada inay si gaar ah u daneeyaan meesha oo Matalan gaadhigii caafimaadku wuu ka maqan yahay oo mar haddii Ciidamo la geeyey xaalado way iska imanayaan markaa in muhiimad gaar ah la siiyaa waa muhiim.

Haddii aan ka hadlo arrimaha dibedda. Arrimaha dibeddu waa muhiim geeska wax badan ayaa is bedelay inaguna in aan la jaan qaadno waa muhiim. Inagu inagoo 1960 nabad ku naaloonayna inaga doonan Soomaaliweyn, waxaynu ka faa'iidnay waan ognahay mar kastana waa laga qayliyaa, laakiin anigu waxaan qabaa markii caalamkii ina yidhi iyaga la hadla in aynu iyaga la hadlo oo waliba Baarlamaankooda aynu ka ololeyno dadbaa inoo joogee oo inaga ina matala, markaa inaynu halkaa ka galno waa muhiim oo waxaynu xaq u lahayn helno, markaa waxaan leeyahay siday Somaliland ku samaataa oo waxay ku helaysaa oo dhalinyaradeenii Tahriibka kaga bixi lahaayeen in aynu qiimaynaa muhiim ah. Teeda kale National Interest ayaa inaga dhexeeya taas hadaynu wada qiimayn wayno oo qof kasta fikir gaar ah ayuu leeyahee aynu wada qiimayno.
Cid kastaa goof gaar ah ayey leedahay haddii Caare jabhadaynayo inuu deegaankooda ka jabhadeeyo ayey ahayd, laakiin deegaano kale wuxuu ku tagaa waa xasarada iyo rabshada. Meeshaa 28 sanadood wax ciidan ah oo la geeyey ma jirin, iyada oo sanaadiiqda iyo wax kasta la gayn jiray nabad baanay kaga soo noqon jireen, dhibaatada ugu badana isaga ayaa keenay oo meesha tagay oo ka qudbadeeyey sabab uu uga qudbadeeyeyna ma garan karo oo Madaxweyne ma ahayn, Taliye la aqoonsan yahay oo la isku raacsan yahay ma ahayn, markaa sabab uu uga khudbadeeyaa meesha ma ool.

Waxaan ku boorinayaa saldanadaas uu meeshooda joogo inay la hadlaan dagaal xal maaha, markaa inay meeshiisa ku soo celiyaan ama ay is dhaafiyaan baan kula talin lahaa, waayo saldanadu inay nabad ka shaqaynso baa muhiim ah dalkuna inoo deganaado waa muhiim. Inahaas ayaan ku soo ururinayaa wabilaahi Tawfiiq Asalaamu Calaykum.

**Md Baar Siciid Faarax** **"11min 45sec"** Bismilahaai Raxmaani Raxiim. Waxaan salaamayaa Golaha. Waxaan u kala qaadayaa laba arrimood, horta waxaan jeclaan lahaa fasax dheer ayeynu galnay oo qaar ayaa aaday meeshii laga soo doortee in laga horaysiiyo siday ahaan jirtay oo laga horaysiiyo xaalada geeska.

Waxaan tagay Gobolka Sanaag Magaalada Ceerigaabo, waxa halkaas ka jira xaalad abaareed oo meelaha qaar saddex jirsatay oo adhigii yaraa dhamaadeen oo wixii yaraa ee ka hadhay ay imika abaartu dib u ragaadisay. Biyo la'aan aad u fara badan ilaa dad ku dhinteen ayaa jirta, waxa jiro hay'ado markii abaarihii dheceen dadka raashin siin jirtay, raashinkaasi meeshii la siin jiray wuu ka joogsaday oo raashin la'aan badan ayaa jirta.

Waxa jira dad badan gobolka degan oo caydhoobay, markii raashinkii laga joojiyey dadkaas xaaladoodu aad ayey u liidataa waxay ila tahay wixii la sugaaba waa dhimasho oo marka ay dhintaan ayeynu meelahaas ka qayl qaylin doonaa markaa waxaan soo jeedinayaa in laga hortago intaas xaaladu sidaas ka fogaan, waxa jirta dawo la' aan, waxa jirta shaqo la'aan baahsan oo gobolka ka jirta.

Dhanka nabadgelyada imika ceerigaabo ayaaba la isku haystaa, barrigii hore Kastamku wuxuu yaalay meel la yidhaa kala-dhac oo 8km laamiga, maantana degmada Ceerigaabo ayey taagan tahay waa nasiib darro waxay ila tahay masuuliyada cida leh ayaa dayacday.

Waxa jirta dhibaato kale oo dhaqaale la'aan ah oo dadku dhaqaale ma haystaan oo waxa ku adkaatay in dadku carruurta ka bixiyaan lacagta iskuulka oo iskuulada waxbarashada, waxaan soo jeedinayaa in bilaash laga dhigo, waayo macalimiintu way waayeen wixii yaraa ee ay carruurta ka qaadi jireen macalimiintuna wax hagaagsan ma qaadato, markaa xukumada waxaan leeyahay arrintaas wax ha ka qabato. Dadku lacagtaas ma heli karaan Hargeisa lagu eryaa meelaha kalena hadalkooda daa.

Meelaha dayacu ka jiro Gobolkaas ee aan tahay, Gobolku wuxuu leeyahay xeeb aad u dheer waanay xidhan yihiin furdadihii oo ma jirto wax gaadiid ah oo ku soo xidhaa, sidaas oo kale hadana waxa xidhan hawadii, nasiib darro waxa ah in ay wada xidhan yihiin Airport-dadii Gobolka ee ceerigaabo ma shaqeeyo, markaa waxay xaaladu maraysaa in wixii mashaqo ah ee ka dhacda in gaadhi lagaga soo qaado bartaas ay ku dhintaan.

Waxa kale oo aan ka hadlayaa xaqiiqdii oo dad badani ila arkeen, waxa soo baxay dhagaxii la dhigay meelo fara badan, dabadeedna waabay ka sii dartay oo markii wixii la dhigay dhammaadeen dhagaxiina soo baxay in gaadhigii 20km wax ka badan aanu kuba soconayn. Markaa Wasaarada Horumarinta Jidadka u soo jeedinayaa bal in waddii dib loogu noqdo oo xitaa haddii Ciid la saaro oo dhagax dadka dhibaatayna la saaro waxbay ahaan lahayd.

Waxa kale oo dadka Gobolkaas degani u baahan yihiin maadaama oo ay Beeralay yihiin maalgelin la siiyo, markaa in loo maalgeliyo dadkaas beeraha, waa nasiib darro iyada oo beeraha ceerigaabo khudaarteed la gayn jiray Muqdisho, Burco inay maanta khudaari uga timaado Ethiopia taas beeraha waxaan soo jeedin lahaa in dadka loo maalgeliyo.

Haddii ta geeska aan u soo noqdo, kolay jaararkeenu way fara badan yihiin Ethiopia waxa inooga taga lacag ka badan hal milyan oo dollar ($ 1,000,000) waxaynu ku badelanaa ma jirto, iyada oo dadkiin sicir barar iyo dhaqaale haysato in inta yar qaad la tago waa nasiib darro. Waxa kale oo gaadiidka Ethiopia soo gala Boorama iyo Wajaalaba, laakiin gaadiidkeenu ka galaan taas xukumadu ha ka jawaabto.

Waxaan ka hadlayaa dadka Oromada ah ee fara badan ee dalka jooga oo aad u jilicsan, waxaana fiicnaan lahayd in dadkaa wax la taro ama dalkoodii lagu celiyo waayo dadkaa cuqubo badan ayaa inaga socota waa in wax loo taraa waana dad Muslim ah oo maato ah.

DP world waxaan arkaayey xildhibaan u mahadnaqaya oo leh wax badan ayey qabatay tii ugu darnayd haday wadaa, waad ogtihiin cashuurtii dadka laga qaadi jiray oo ay la wareegtay oo aynaan ogayn waxaynu ku bedelanay oo ilaa imika waxba laga la'yahay. Wadadii ma jirto waxay noqotay mid la kar karayo, Airport-kii la inoo samayn lahaa lama hayo, ma jirto dekedii la bilaabi lahaa. Haddii la raacay wixii Golaha la keenay heshiis muu hayne aynu isla qaadano, qodobo ayaa ku jiro haddii lix bilood lagu bilaabi waayo inuu burayo heshiisku imika dhawr sanadood aynu maraynayaa.

Hadda waxa soo cusboonaaday sicirkii cashuurta ayaanu ugu dhufanaynaa ka suuqa halkii markii hore ay ta Banka 6000 ahaa, arrinkaa Goluhu aad ha ugu fiirsado lacagtii Sicir bararka ahayd ee dadka la doonayey in hoos looga dejiyo ee horeba dadka u naafaysay ee dadku la baaba'sanaa ayaa Dp world isticmaalaysaa inay Rate ugu dhufato dawladuna Dp world ayey taageertay, halkii ay dadkeeda ganacsata iyo dadkeeda masaakiinta ah taageeri lahayd.

Golaha waxaan leeyahay Masuuliyada ayaa idin saaran Ilaahay ka baqa, arrinkaasi waa aafo dalka ku soo socda ha laga hortago. Waan dhameeyey salaamu Calaykum Warax matulaahi Wa Barakaatu.

**Md. Maxamed Jaamac Cabdi** **"16min 50sec"** Bismilahaai Raxmaani Raxiim. Aad baan u salaamayaa shir-guddoonka, Gole weynaha iyo saxaafadaba. Waxaynu ka hadlaynaa arrimaha geeska Afrika. Waxaynu uga hadlaynaa waxaynu dareemaynaa, waxaynu aragnay oo taabanay in is bedel jiro. Waxa dareenkeena kiciyey ee is bedelku wuu inoo

muuqdaa, macnaha looma baahdo baa la yidhi laydhka haddii aan mugdi jirin, markaa haddii aanu dareenkeeni kicin in aynaan nidhaahneen maxaa geeska afrika ka jira.

Waa run geeskja Afrika is bedel weynbaa ka jira sidaynu uga hadlayno iyo sidaynu aragno uga wuu ka guddo balaadhan yahay waanu ka weyn yahay. Arrinta la xidhiidha geeska Afrika iyo is bedelka ka jiraa maaha oo kaliya is bedelka Raysalwasaarada Ethiopia iyo magacaabistiisa iyo imaanshiyihiisa iyo talaabooyinkii uu qaaday oo kaliyaata maaha wuu ka baladhan yahya, horena is bedelku wuu uga socoday geeska Afrika, hadana waxa soo kordhay dawladii ka dhisnayd Ethiopia ee uu hogaaminay markii hore Meles Sanawi, markii dembana Heyle Maryam Desele oo ahayd dawlad aad u xidh xidhan oo gacan adag ku haysta deegaanada iyo dadka la jaar ah iyo iyada gudaheeda intaba, tii markay meesha ka baxday is dhexgalkii iyo intregation ayaa bilawmay.

Dagaalku intaas wuu ka balaadhan yahay oo ururo badan oo caalami ah iyo siday u shaqayn jireen ayaa meesha ka baxday, mabda’ii ahaa in dawladi aanay dawlad kale farogelin meesha way ka baxday. Kii xuduudaha ayaa imika noqday mid dano ah (Interest) oo halkii marki hore ka ahaayeen xuduud caalmi ah calamado la yaqaano leh wuu is bedelay oo wuxuu isku bedelay blocks ee Ethiopia ka socda.

Dagaalku intaas wuu ka balaadhan yahay oo waxa soo noqday dagaalkii qaboobaa ee adduunka oo soo noqday oo wajigiisu yahay mid dhaqaale oo imika dhaqaale xoog ah oo la isku hayo adduunka uu dhexmarayo.Barrigii hore dagaalku wuxuu u dhexeeyey quwadihii kala ahaa Shuuciyada iyo kabitaalisamka oo kala fadhiyey ayey ahayd. Markaa kii imiku wuu ka duwan yahya, geeska afrika waxa ruxaya waa dagaalka lagula jiro dalka China iyo Ruush iyo dadka degan suurta galka tahay ee maqandaqadan aynu degan nahay ee xeebta dheer Somalida.

Maaha Somalililand oo kaliya waa soomaali oo dhan oo leh xeeb dheer oo ku taala alaabkii adduunka laga galayey, waa meellaga ilaalinayo inChina uu ka galo Afrika marinka oo ah marinka Baabul Mandab oo maraykan ka ilaalinayo oo Yurub ka ilaalinaya. Maanta gumaysigu kii tooska ahaa maaha, markaa laba hab ayuun baad kaga qaybgeli kartaa khayraad adigu aad leedahay oo lagaa doonayo ama lagaa xadayo ama lagaa qaadanayo oo adigu gacanta ku haysid, sidaa daraadeed baada taarged ugu tahay in aad qayb ka noqotid iyo arrinta labaad oo ah in aad leedahay tiro dad ah oo aad noqon karid suuq wax laga iibiyo waxna iibin karta waxna laga iibin karo, markaa inagu waxay nahay qolodada koowaad oo ah dadkaleh khayraad aanay ka faa’iidaysan.

Khayraad aanad ka faa'iidaysan waa laga faa'iidaysanayaa. Sidaa daraadeed bay u noqtay in ay adkaato in Maraykan ama Yurub ay gacanta al soo galaan oo ay yidhaahdaan dekedaa waan idinka kiraysanaynaa, markaa dagaalkii wuu cad yahay.

Markaa dagaalkan dhaqaalaha waxa ku jira oo iyaguna masaaliix ka leh wadamada Carabta ee Sucuudiga iyo Emaaraadku hogaaminayaan deyn weyn bay ka leeyihiin waa dadka ay taabanaysoi ku tahay suntan xeebteena dheer ee adduunka uga dhaw. Waxay ku qasbanaadeen sida maanta wax yihiin xeebaha Soomaaliyeed oo dhan danta aynu ka leenahay ka kiraystay ayaa in ka badanka leh. Waayo waa inuu gacanta ku hayaa isagu waa in aanu soo gelin Turk, China iyo Iran oo ah kuwa laga ilaalinayo.

Inagu waxa weeyee cid kasta maslaxad ayey leedahay masxaldeenu waxa weeye inay jirto dagaalada dhacaya in ay jirto cid aynu danaheena ku ilaashano oo dhulkeena inoo ilaalisa oo mashaakilaad dunida ka jira aynu ku ilaashan karayno ama buur ahaw ama buur ku tiirsanaw.

Is bedelkaasi wuxuu keenayaa 1884 oo kale dad nool oo jira oo sida soomaalida oo kale ah oo inta la tashado dad Afrika aha ama dad Carab ah iyo dad markii horeba adduunka u talin jiray intay u tashadaan dhaqaalahooda iyo noloshooda laga taliyo oo gacanta loo galiyo cid uun. Waxa muuqata is bedelka geeska Afrika ee maanta socdaa waxa la darsay soomaalidu waxay haysataa xaga dhulka balaadhan, waxaynu haysanaa Somaliland xeeb aad iyo aad u dheer oo 1500 iyo dheeraad ah. Waxaynu leenahay xeeb aad iyo aad u dheer, xeebtaas ma ilaalino, kama faa'iidaysano haddii aynu halkaas ka baxno oo dhulka xeebta ahna marno waa cidla, sidaa daraadeed hadana dadku waa baahan yihiin oo dadkii dhulkaas lahaa way ka baahan yihiin ee addunka dad xeebaha sidan oo kale haystaa sida Jaban oo 300 oo xeeb ah haysataa way ka faa'iidaysteen, waad aragtaan indonisia inta ay bad haysato haddana iyadaa adduunka ka iibisa khayrdaadka badda ka soo baxa.

Waxa weeyaan inaga intaas lihina waynu gaajoonaynaa oo baahi ayaa ina haysa, taas waa laga faa'iidaysanayaa adduunkiina wuu u soo jeestay, umadda kale oo 110 miliyan ama 120 milyan ah oo xeeb aan lahayn oon bad lahayn oo ilbax ah ayaa maanta ina dul fadhida. Adduunku waxay doonayaa in wax laga iibiyo oo wax laga faa'iidaysto tiradooda dartood, waxa la doonayaa waa dad kiristan ah oo xaga diinta loo danaynayo, oo dabaradaasi xaga diinta kol waa jabayaan marka la eego danta waxa la horumarinayaa dhaqaalaha oo marka Suciidi Erabiya diintu dabar uma ah inay yidhaahdaan dal oo Kiristan ama dal Muslim ah danihiisaan ilaalinayaa, maya danahiisa ayuu ilaalinayaa tiisaanu horaysiinayaa.

Dagaalada la doonayaa waa kuwaas, waa kuwa dusheena ka dhacaaya oo xoog laguma qabsan karee integration, markaa Ethiopia Somaliland iyo Somalia waxay ku imanaysaa

integration taargetka koowaad ee Ethiopia waa xeebaheena ama hadda ha lagu yidhaahdo ama mustaqbalka ha lagu yidhaahdo. Ciidanka Ethiopia u dhisani waa ciidan aan bad lahayn, laakiin waa ciidan badadiisa la yaqaano adduunkuna wuu kula talinayaa, taas inaynu talo ka leenahay waa wax muhim ah. Waxaan ku talin lahaa anigu geeska Afrka is bedel aynu ka samayn karno oo is bedelka aynu samaynaynaa waxa weeye, haddii aynu samaynay waxa weeye inaynu saldhig bixinay oo ka kiraynay dekekadii kiraynay dee saldhigo iyo dekedo kale waynu bixin karaynaa. Wax inoo diidayaa ma jirto inaynu Raashiya soo dejino Ceel-garde oo aynu nidhaahno haddii taas la qabsaday kaalay meel heblaayo soo deg inaynu nidhaa kaalay samee madaaro kale oo sandhigo kale samayno (Bases) oo chine keeno waxay sahlaysaa muhiimada iyo qiimaha aad leedahay way kordhinaysaa ilaalada dalkaagana way u sahlaysaa oo maanta waxay maanta china dhibaato inagu haysaa ma jirto oo ay danteena ka soo horjeedaa ma jirto.

Laakiin waan ganayaa dawlada Emirate iyo waxa ka imanaya mana difaaci doonto haddii maanta xeebaha Somaliland cidi soo farageliso, laakiin wixii aynu dano iyo stretigy ka lahayn waxay ka dhamaysanay adduunkiina wuu ina arkay kuma xidhinii una dabranin interest intaas ka balaadhan ayeynu samayn karnaa. Talada aan xukumada u soo jeedinayaa waxa weeye in loo yeedho oo lagu soo dhaweeyo Jabuuti waa dhod yar waxay kaga badbaaday in la qabsado loolanka adduunka ka jira oo ah halka la doonayo in laga galo Afrika oo halka lagu loomayo ee stretigy ahi waa geeska Afrika inuu keeno oo mandaqada soo dhex gfadhiisiyo cid kale oo ilaalisa isaga ayuu suurtogeliyey wax inoo diidayaana ma jiro inaga inaynu nidhaahno maanta Turki ha yimaado oo Iran ha timaado marka laga tago caaqidadeeda iyo mushaakilkeeda diiniga ah, waxa weeyaan dal wax lala qabsan karo oo lala midoobi karo oo ay iska soo jorjeedaan kuwo badan oo aan maanta danaheena aan ilaalinaynin, markaan waxaan soo jeedin lahaa in xukumada loo fasaxo oo la yidhaa waxaad raadisaaa cid kale oo dalkeena maalgeliso, cid kale oo ganacsigeena xoojisa, cid kale oo macdanteena sahamisa oo soo saarta oo aan ahayn Emaaraad iyo cida wada Blaock-gan xidhan.

Markaa ka dib Ethiopia waa dal aynu walaalanahay waa dal population badan oo dekedaheenu u baahan yihiin, waxaynu ula macaamilaynaa inaga oo is hubna oo xor ah oo cagaha dhulka ku hayna ayeynu la macaamilaynaa, laakiin inagoo gacanteeda ku jirna suurto gal maaha in aynu la macaamilno taasi waa taas.

Arrimo kale oo xildhibaano ka dhawaajiyeen oo halkan shalay laga hadlayey oo ay ka mid tahay arrintii shirka Diridhaba, anigu ma garanayo sababta shirkaa Somaliland iyo beesha dhexe ugu sacabo tuntay oo ay uga qayb gashay hebel markuu yimaado hebel kale ayaa imanaya, haddii cidi abaabusho oo qabyaalad la bilaabo oo inaga oo kala daadsan Somaliland oo u yeedhano inaga oo kala daadsan oo halkan ka tumaynaa waxa weeyaan aniga wax macno leh oo buuran oo ay ii samaynaysaa ma jirto mana garanayo ma waxa is bedelay mawqidkii beesha dhexe ayaa eek u dhagaanta Somaliland iyo

soomaalia na dulmida inta wixii oo dhan la iska daayey ayaa boholyoow Soomaaliyeed ina hayaa.

Haddii ay taa tahay maba xumee boholyoowga somaalidu ha ina wadda gaadho, oo aynu ka tashanoo markii hore waynu ka tashanee aynu dib ugu tashano. Arrimaha kale ee la xidhiidha wasiirkii halkan yimid ee Eriteria ka yimid, waan ku hambalyeynayaa Xukumada, waxay u eegtahay maalmahan iyo wiigagan ina aynu hore u taalbsanayno,waxaanad moodaa inaynu arrimaha geeska la qabsanayno is bedelka ka socda geeska dhanka noqono xukumada waan kula shaqaynaynaa, waana ku hambalyeynaynaa wixii kale ee talo ah oo Guddida arrimaha dibedda ee Golaha ayaa joogta iyo cidii kale ee lagama maarmaan ah kula soo noqoto Golaha, inaga oo darsayna xidhiidhka Ethiopia iyo Eriteria xidhiinta, Eriteria iyo Jabuuti oo aynu is waydiino haddii aanay heshiinin xidhiidh ka samayno oo aynu is weydiino keebaa inoo miisaan roon, keebaa inoo waxtar badan, labadaba ma isku wadi karnaa waa arrimo ay tahay in si taxadar leh loo eego oo aynu miisaanka saarno oo haddii aynu heshiisiin karno waa wax wanaagsan, waa dal wax badan laga faa'iidi karo oo waayo raganimo leh oo sidaynu u godoon sanayn u gadoonsanaa muddo dheer Eriteria, waa dal yaqaana sida loogu noolaado geeska afrika oo kaa xidh xidhan. Sidaa daraadeed waan soo dhawaynayaa aad baan u soo dhawaynaynaa talo badana in laga qaato, laakiin aynaan ku waayin Jabuuti oo gacmo siman ku wado wadno waan ku talinayaa Wa salaamu Calaykum.

**Md Ibraahim Mahdi Buubaa"25min"** Shir-guddoonka, Mudanayaasha, Shaqaalaha, Marti sharafta iyo saxaafada, waxaan idin ku salaamayaa salaanta islaamka ASalaamu Calaykum Warax matulaahi wa barakaatu.

Qaybta 1aad Waxa aynu ognahay mudanayaal is bedelka siyaasadeed ee balaadhan ee ka socda Geeska Afrika.

a) Is bedelada Guddaha Ethiopia ka socda.
b) Heshiiyada Ethiopia iyo Eriteria.
c) Wada hadalada qabyada ah ee dawladaha Jabuuti iyo Eriteria
d) Cuno qabataynta hubka ee Eriteria laga qaaday oo saamayn ku yeelan karta Geeska Afrika.
e) Somaliya oo Iyana dalbatay in cuno-qabataynta hubka laga qaado oo saamayn inagu yeelan karta. Deymaha somaliya lagu lahaa oo ay dalbatay in laga dhaafto.
   Si deyn cusub au u hesho isla markaana lacag cusub ay daabacato saamayna inagu yeelan karta.
f) Hubka Qadar ay ku caawisay Somaliya, iyadoo la qaadin cuno-qabatayntii saarnayd. Xukumada Somaliland ay aad uga hadashay

g) Ciidamada Somaliland iyo Putland ama somaliya wali is horfadhiya, wax waan-waan nabadeed oo muuqataana aanay wali jirin. Iyada oo saacad kastana dagaal dhiig badani ku daataa qarxi karo.
h) Jabhada Caare iyo Saraakiisha Ciidanka Qaranka Somaliland oo wiigii ugu dambeeyey T.V isu marainaayey hadalo iyo hanjabaado.

Mudsnayaal Sidaa daraadeed, waxaynu u baahan nahay in si taxadar leh aynu u fiirino isla markaana siyaasada xukumadeena ay arrimahaas oo dhan ay ku qaabilayso.

Gole ahaan aynu door weyn ku yeelano qaabka xukumadeenu u jaan goynayso arrimahaas balaadhan ee aynu kor ku soo sheegay. Kuwaas oo Somaliland ku yeelan kara saamayn taban ama mid togan.Gaar ahaan:-

1. Qadaiyada Madax-banaanida Somaliland
2. Dhanka dhaqaalaha iyo dhaqanka.
3. Dhinac amniga iyo nabad ku noolaashana mandaqada.

Waxa anigoo dhammaan dedaalka xukumada soo dhawaynaya ee arrimaha kora an kuu soo sheegay qaabilsan. Haddana doorkii Golaha Barlamanka ku lahaa waa mid aan idinku baraarujinayaayo in aynaan ilduufin Xukumadana kaligeed aanay is wadin giraanta.

Qaybta 2aad **Wada hadalada Somaliland iyo Somaliya,** Xukumadihii ugu dambeeyey ee Somaliland iyo Somaliya waxay bilaabeen 2012 wada hadalada labada dhinac. Waa muddo imika laga joogo 8 sanadood shirkii London ka dhacay 2012 ee xaga Somaliland uu hogaaminaayey Madaxweynihii hore ee Axmed Siilaanyo. Halka dhinaca kalana uu hogaaminaayey Sheekh Shariif sheikh Axmed, isla markaana uu bedelay Xasan Sheekh Maxamuud wada hadaladaa oo lagu soo hadal qaaday saddex qodob oo kala ahaa

1. In aan la iska carqaladayn wixii kaalmo ah ee labada dhinac ka helayaan beesha caalamka.
2. In hawada Somaliland iyo Somaliya laga gaadho heshiis sidii Hay'ada Qaramada Midoobay ee gacanta ku haysay loogala soo wareegi lahaa isla markaana sida loo maamulaayo heshiis ay ka gaadhaan Somaliland iyo Somaliya.sh.
3. In wada hadalada siyaasadeed ee mustaqbalka ay si toos ah labad dhinac uga wada hadlaan.

Waxay dhammaan ku soo dhamaadeen is AF-garan waa, iyadoo waliba Hawadii ka dhaxaysay labada dal maamulkeedii ay si toosa ula wareegeen Somaliya, taasoo waji gabax ku noqotay siyaasada Somaliland iyo bulshadeedana wixii intaa ka dambaysay may dhicin kulamo kale oo wax midho dhal ahi ka soo baxeen.

Maanta hadaba, iyada oo beesha caalamku iyo wadamada barriga Afrika ay culays labada dhinac ku saarayaan in la wada hadlo. Madaxweynaheena wuxuu dedaalo badan

u galay in wada hadalada midho dhal ahi qabsoomaan. Waanan ku amaanayaa Madaxweynaheena.

Haddaba waxa muuqata in aanay jirin dedaalo ay Dawlada Somaliland ugu jirto u diyaar garawga wada hadalada. Caalamka iyo iyo wadamada barriga Afrika ay wadaan ee laga yaabo in dalka Ghana ay ka qabsoomaan dhammaadka bidhan aynu ku jirno. Sidaa daraadeed, waxaynu baahan nahay Xukumada iyo Gole ahaanba in aynu samayno dedaalo dheeriya oo aynu ugu diyaar garaabayno kulamada fooda inagu soo haya. Waxaynu u bahan nahay:-

1. Sharci ahaan in aynu khuburo Somaliland ah u diyaarino kulamadaa.
2. Aqoon ahaan in la helo kulamo lagu ururinayo talooyinka aqoonyahan Somaliland, iyada oo dood cilmiyeysan laga siiyeesho u diyaar garawga shirk aka dhacaya Ghana.
3. In aynu Xukumada ku dhiirigelino midnimada umadda Somaliland oo doiorashooyinkii dhacay 2017 ay saamayn ku yeelatay, taasoo haddii aynaan bulshada Somaliland Gobolkay doontaba ha ku dhaqnaadaane midnimadooda aynaan ka shaqaynin inoo keeni karta dhaawac siyaasadeed oo saamayn ku yeelan karta wada hadalada aynu la galayno Somaliya.
4. Asxaabta Qaranka oo iyanaga loo baahan yahay in ay Xukumadu ku soo casuunto kulamo lagu lafa gurayo sidii wada hadaladaa Somaliya loogu diyaar garoobi lahaa

Qaybta 3aad, Heshiiyada siyaasadeed iyo dhaqaale ee Somaliland iyo Dawlada Faderalka Ethiopia wada galeen. Sidaynu wada ogsoonahay Xukumada uu gadhwadeenka ka haa Axmed Siilaanyo waxa heshiisyo kala duwan ay la gashay Emaaraadka Carabta oo dhinac ah iyo Shirkada DP world oo dhinac ah. Haddaba heshiiyada kala duwan waxa ka horkeenay Golaha Wakiilada oo lagu ansixiyey waxay Xukumadu ku tilmaamtay (Pillars) tiirarka heshiiska DP world iyo Somaliland dhexmaray. Sidoo kale labada Gole ee Barlamaanka Somaliland waxa lagu ansixiyey heshiiska dhexmaray Dawlada Emaaraadka iyo Somaliland ee ku sababsanaa Saldhiga (Military Base) ee Madaarka Berbera ay kula wareegtay Dawlada Emaaraadka Carabta.

Taasoo deked military ka dhistay xeebta Berbera meel aan ka fogayn Madaarka Berbera. Haddaba Mudnayaal labada heshiis ee Xukumadeenii hore iyo Emaaraadka iyo Shirkada DP world ay wada galeen oo uddo Afar sanno ahi ka soo wareegeen markii qalinka lagu duugay.

Waxa ka soo noqday Mad-madaw farabadan. Taas oo shaki badan ku abuurtay bulshadeena, sidoo kale waxa mar dambe soo baxay in Dawlada Ethiopia ay qayb ka tahay, iyada oo kulamo ay yeesheen Madaxa shirkada DP world iyo Rasalwasaaraha

Ethiopia ee bsihii ina dhaaftay ka dhacay Addis Ababa aan marnaba lagu soo qaadin 19% ay Ethiopia la inoo sheegay in ay ku leedahay maalgelinta Dekeda Berbera .

Sidoo kale kulankii ugu horeeyey ee Muuse Biixi iyo Abey Axmed laguma soo qaadin 19% heshiiska DP world iyo Somaliland 19% ay ku leedahay maalgashiga DP world ay ku samaynayso Dekeda Berbera. Dhammaan marka aynu isku soo wada duubno heshiisyadaas, waxaan odhan karaa;

1. Somaliland wax aka jira culays dhaqaale oo ay ugu dambaysay tacrifado ay ku kordhinaayeen koontiinarada ka soo gada Dekeda Berbera, Shirka DP World.
2. Dhawaanahan waxa soo ifbaxaya hadalo is khilaafsan oo Madaxda Xukumadeenu marar kal duwan ay ku hadlayeen taas oo ku saabsanayd heshiisyada dawlada Emaaraadka ee Saldhiga Military iyo Heshiiyada dekeda Berbera ee Shirkada DP world aynu la galnay, isla markaana rajo badan ee laga qabay dhinacyada dhaqaalaha dalka iyo siyaasada is xulufaysiga ee mandaqada ka jirta galisayna calaamad su'aal?
3. Waxaana ka dhashay in laba Safar oo is xiga ay Madaxweyne ku xigeenku iyo Madaxweynahuba ku tageen dalka Emaaraadka, taas oo aynaan si rasmi ah u ogayn waxa laysla soo meel dhigay. Marka laga tago hadalada siyaasada ku dheehnnayd ee Madaxdeenu u sheegeen bulshadeena ee ahaa in laysa soo afgartay.

   Sidaa daraadeed, Mudanayaal waxaynu u baahanahay in Gole ahaan aynu Xukumadeena ka dalbano waxa laysla soo fahmay ee heshiiska hore ee Xukumadeenii hore gashay iyo Xukumadeenan maanta kukala duwan yihiin.

Qaybta 4aad, Arrimaha Guddaha Somaliland Doorashooyinka Goloshayaasha

1. Ceeb kale malaha oo aan muddo dhaaf ay talada hayeen ahayn
2. Xukumada laga rabaa in ay qabato doorashooyinkii.
3. Duruufaha ku xeeran ay xal u hesho, isla markaana ay abuurto saaxadii ay ku qabsoomi lahayd doorashooyinkaa muddo dhaafka ahi.

**Dastuurka Dalka**

1. Heshiisyadiid Cali khaliif Galaydh maaha aayad Qur'aana.
2. Doorashooyinka Madaxtooyada.
3. Xisbiyada Qaranka

**Musharax Madax-bannaan:- Talo soo jeedin** In aynu u yeedhno Madaxweynaha Somaliland si aynu wax uga waydiino dhammaan qodobadan kor aan ku soo sheegay haday tahay;

**1.** Dhinaca siyaasada iyo is bedelada Geeska.

2. Dhunaca dhaqaalaha iyo heshiisyada Dawlada Emaaraadka iyo Somaliland dhexmaray.
3. Wada hadalada Somaliland iyo Somaliya oo dhawaana aynu ka war qabno in Raysal Wasaaradaha Ethiopia oo uu la socdo Mr Farmaajo uu Madaxweyneheenu ku soo wargeliyey in garoonka hagaysa ay ka soo dagayaan taas oo ku noqotay Madaxweynaheena arin layaab leh oo mucjiso ah. Balse markii dambe ay isla qaateen Muse Biixi iyo Abey Axmed in socdaalkaa la baajiyo.
4. Sidoo kale si aynu wax ugu waydiimo siyaasada Arrimaha gudaha Somaliland oo u baahan in aynu indho fayaw ku eegno xaaladaha kala duwan ee ka jira Gobolada dalka iyo dhinacyada doorashooyinka iyo Amniga.

   Sidaa daraadeed, inaad igu raacsan tihiin in Madaxwaynaha ka dalbano in uu Golaha soo hor fadhiisto.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ______________________________ | ______________________________ |